



**DUGSIGA DEGMADA LANSING
ARDAYGA IYO QOYSKA
BUUG-GACMEEDKA**

Sannad Dugsiyedka 2023-24



Lansing[®]
School District
Royska

DARYEELIDA . WAIDA SHAQEUNTA . HEER SARE



2023-2024
Gudigga Waxbarashada

Rachel Willis

Madaxwaynaha

Robin Moore

Madaxwayne ku xigeenka

Dr. Saturnino Rodríguez

Xoghayaha

Missy Lilje

Qasnajiga

Dr. Farhan Bhatti

Dr. Dhaqtar Caitlin Cavanagh

Guillermo Z. López

Dr. Dhaqtar Deyanira Nevárez

Martínez

Rosalyn Williams

Xubin

519 W. Kalamazoo St.
Lansing, MI 48933

www.lansingschools.net

Jadwalka Tusmooyinka

Hordhaca

Fariinta ka imaaneyso Fullinada

Hordhac

Qaabdhismeedka loogu tallogalay Dugsiyada Weyn

Kalaandarka Degmada

Title IX

Lambarada Taleefonka Wax ku oolka ah

Filashooyinka

Muwaadinnimada

Xeerarka Muwaadinnimada ee Dugsiga

Tallaalada waxaa looga Baahanyahay Gelitaanka Dugsiga Michigan

Fursada Waxbarashada Loo Siman yahay

Door siinta waalidka

Xaqquqaha iyo Waajibaadka ardayga iyo Waalidka

Faya qabka Ardayda

Wargelinta Lagu laasimay ee Xadgudubka ama Dayacaada Canuga

Dhaawaca iyo Xanuunka

Seerka iyo Siyaasada Xaadrista

Adeegyada Guriga lagu Baxsho

Carruurta Guri la'aanta iyo Dhalinyarada

Xoriyatul Qawlka Ardayda

Walaacyada Ardayda, Tallooyinka, iyo Cabashooyinka

Buug yaraха Labiska Degmada oo Dhan

Buug yaraха Ardayda ee Hawlaha ka baxsan Manhajka

Qaybinta Dukumiintiyada Qoraalka ah

Seerarka Isticmaalka Aalada Isgaarsiinta Elektarooniga ah

Isticmaalka Tignooloojiyada iyo Seerarka Badqabka

Seerarka iyo Sharciyada Habdhaqanka Badqabka Baska Dugsiga

Habraacyada Habdhaqanka Badqabka Baska Dugsiga

Talaabada Anshaxaa

Cawaaqibka ardayda iyo Caawimaadaha Sixitaanka Dabeecada

Talaabo Edbin ah

Ogaysiiska Waalidka

Farsamooyinka Sixitaanka ah

Baariitaannada iyo La wareegida

Baariitaannada Ardayda

Baariitaannada Qaanadaha

01-06

Qalal

26

01 Baarista Gaariyaasha

26

02 Gacan qabashada ama Gardaduubka ay sameeyaan Shaqaaluhu

27

03 Habdhaqannada Keeni kara Talaabo Edbin ah

28-32

04 Dugsi ka hakinta

32-33

05 Fasal Ka saarida Macalinku sameeyo

33

06 Tilmaamaha Fasal Ka saarida

33

U cayrinta Xafiiska Dhaqanka Dugsiga

33

07-21

Dugsi Ka cayrinta

34-35

07 Fasal Ka cayrinta Gobalka Qasabka ka dhigay

34

07 Sababaha Qasabka ah ee La tixgelinaayo

34-35

07 Fasal Ka Cayrinta aan Qasabka ahayn

35

08 Habraacyada Racfaanka

36

08 Ka joojinta Ka joojinta Dugsiga

36

08-11 Go'aannada Xafiiska Dhaqanka Dugsiga

36

11 Go'aannada Kooxda Talo Bixinta

36

11 Dib usoo celin

36

12

Tilmaamaha Anshaxaa

37-38

14 Nooca Anshaxaa

37

15 Heerka 1 aad: Caawimaada Macalinka/shaqaaluhu Sameeyaan

37

16 Heerka 2 aad: Caawimaadaha Maamuluhu Hagaayo

37-38

16 Heerka 3 aad: Dookhyada Kale ee Gudaha Dugsiga

38

17 Heerka 4 aad: Cayrinta Banaanka Dugsiga

38

17 Heerka 5 aad: Cawaaqibyada Kale/Barnaamijyada

38

18 Heerka 6 aad: Kulanka Eryida/Cayrinta

38

18 Habraacyada Habdhaqanka Badqabka Baska Dugsiga

21

19

Waxqabadka Edbinta

39-42

20 K-8 Waxqabadka Edbinta

39

21 9-12 Waxqabadka Edbixinta

40

22-36

Anshaxaa ardayda leh Qorshayaasha IEP da iyo 504

41-42

22 Xog dheeraad ah

43-44

22-23 Ceerka Anshaxaa Waxbarashada Oonleenka ah

43

23-24 Isticmaalka Saxda ah ee Tignooloojiyada

43

24-26 Himilooyinka iyo Eedaabta Ardayda

43-44

24-25 Talaabada Edbinta

44

25-26 Waajibaadka Waalidka/Masuulka

44

La kulan Kooxda Fullinta!



Ben Shuldiner
Kormeeraha Guud



Sergio Keck
**Ku xigeenka Kormeeraha
guud ee Dadweynaha
Gaarka ah iyo Barnaamijada**



Jessica Benavides
**Ku xigeenka Kormeeraha
guud ee Dugsiyada**



Cordelia Black
**Agaasimaha Fullinta
ee Dhaqanka Dugsiga
iyo Cimilada**



Kim Adams
**Caawiyaha
Kormeeraha guud ee
Maaliyada iyo Miisaaniyada**



Kristina Tokar
**Sarkaalka Madaxa
Howlgalka**

Fariinta ka imaaneyso Fullinada

Ardayda iyo Waalidiinta Qaaliga ah,

Kusoo dhawaada Dugsiga Degmada Lansin waxaana idii leenahay nasiib wacan sannad dugsiyeedka 2023-2024! Anagoo wakiil ka ah shaqaalaha iyo maamulka, waxaa sharaf noo ah aana ku faraxsan nahay inaad noqoto ardaygeena. Haddii aad tahay arday cusub ama mid dugsiga kusoo laabtay, waxaan sugaynaa inaan sannad guul leh helo si wadajir ah.

Dugsiga Degmada Lansing waxay u taagan tahay siinta ardayda khibrado waxbarasho oo macno iyo muunad leh oo ay ka helaan xarun kobcinaysa hamida kobaca shaqsiga ah iyo guusha waxbarashada. Waxaa sharaf noo ah inaan idin fidino fursadaha kaladuwan ee waxbarashada iyo nashaadaadka ka baxsan manhajka oo loogu talagalay inay kor u qaadaan khibradiina dugsiga balaarinaaya higsigiina. Guul laga gaaro dugsiga iyo mustaqbalku waa dadaal wadareed u dhixeyya adinka, shaqaalaha dugsiga iyo qoyskiina. Wuxaan idin ku boorinaynaa inaad ka faa'iidaynsataan fursadaha balaaran ee qaaska ah ee aan bixino si aad u gaartaan yoolalkiina.

Ujeedada buug yaraahan waa inaan idin siino meel aad kala socotaan tilmaamaha degmada. Wuxaan ku boorinaynaa in qoysasku waqtii siiyan akhrinta buug yaraahan si wadajir ah. Xogta ku qoran buug yaraahan ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydkeena ee www.lansingschools.net.

Hadafkeena

Ku bixi waxbarasho tayo sare deegaan badqab ah dhaqan ahaan oo kobcin leh oo taageerto ardaydoo dhan si ay ugu noolaadaan nolol ujeed buuxo oo dhameystiran.

Hadafkeena

Jawi waxbarasho waxqabad sare leh, loo dhanyahay, meeshaasoo dadka ka wada shaqeeyaan bulshadeena kala duwan dhaqan ahaan oo xooga saarno u diyaarinta ardayda muwaadinnimo ka qeybgal leh, ujeed leh.



Hordhaca

Gudigga Waxbarashadu waxay muhiimad wayn siiyaan masuuliyada siinta goob amaan iyo badqab leh ardayda iyo shaqaalaha lagu aaminay daryeelkooda. Goob qadarin leh ayaa muhiim u ah hanaanka waxbarashada. Gudigga Waxbarashada ayaa abuuray Buug yaraahan Ardayda si loo baxsho heerarka iyo hab dhismeedka muhiimka u ah kobcinta goobtaas waxbarasho ee badqabka leh taasoo ardaydu ay wax ku baran karaa ayagoo kobcinaya maskaxdooda, jirkooda, dareenkooda iyo la dhaqankooda bulshada. Mabaadii'da soo socota ayaa loo adeegsaday abuurida Buug yaraha Ardayda:

1. Buug yaraha wuxuu baxshaa hanaanka muhiimka u ah waxbarashada. Nidaam la'aantu waxay caqabad ku tahay diirad saarida waxbarashada. Hase yeeshi, buug yaraha waa inuusan xanibin hal abuurka ama farxada waxbarashada.
2. Buug yaraha wuxuu dufaacayaa xaquuqda ardayga iyo waalidka ayadoo sidoo kale la xaqijinaayo waajibaadkooda ku aadan inay noqdaan muwaadiniin wanaagsan.
3. Buug yaraha waxaa ku jira tilmaamaha xal u helida habdhaqanka xun (ka fiiri boggaga 19-22) kahor intaysan kasii darin. Xeerku keliya diirada masaaraayo xal u helida ciladaha anshax xumada ardayda ee Aadka u daran.
4. Hanaanka ayaa lagu dhisay qadarin wadareedka u dhixeyya macalinka-maamulaha-ardayga-waalidka. Hanaanka waxyelo uma gaysanaayo sumcada qofka.
5. Waalidiinta ayaa masuul ka ah anshaxa ardaydooda waana inay door ka qaataan xal u helida ciladaha ardayga. Ardayda gaaray da'da 18 ayaa dooran kara inay masuul ka noqdaan anshaxooda.
6. Dhammaan xubnaha bulshada dugsiga, ayna ku jiraan ardaydu, ayaa laga qaybgashay abuurista Buug yaraha.
7. Buug yaraahan wuxuu tixgelinaya muhiimada mabaadii'da cadalada edbinta iyo farsamooyinka iyo Taageerooyinka Caawimaada Dabeeecada Wanaagsan oo bud-dhig u ah xal u helida habdhaqannada xunxun iyo kor u qaadista dhaqanka iyo cimilada dugsiga ee wanaagsan.

Buug yaraahan ayaa raacaaya dhammaan xeerkala quseeya ee Waaxda Waxbarashada Michigan iyo sidoo kale xeerkala gobalka iyo federaalka ee la xariira edbinta ardayda waxbarashada guud/waxbarashada gaarka ah. Buug yaraha meesha ka saaraayo xaquuqhaa hanaanka ee ku cad sharciyada federaalka ama gobalka ee ardayda loo aqoonsado inay u qalmaan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada ama taageerada macquulka ah ee naafadooda.

Kormeeraha Guud ee dugsiyada ayaa masuuliyada ugu danbaysa ka saaran tahay inuu Buug yaraahan u bixiyo qaab quman, cadaalad ah oo macquul ah asagoo usii marinaaya Dugsiga Degmada Lansing.

Dhammaan Buug yaraahan, Kooxdu:

- **Waalidka** waa in loo fasiraa si loogu daro "waalidka ama masuulka sharciga ah."
- **Maamulaha** waa in loo fasiraa si loogu daro "maamulaha ama wakiilkha."
- **Macalinka** waa in loo fasiraa si loogu daro "macalinka, badelka dugsiga, ama badelka muddada dheer."

Ardayda K-12

Si loo joogteeyo jawiga wanaagsan ee dugsiga waxbarashada, Xeerkal Yunifoomka ardayda oo leh Heerarka Edibinta iyo Anshax Xumada ayaa la abuuray. Maamulaha ayaa u sheegaaya waalidka/masuulka markasta oo ilmo laga hakiyo waxbarashada kahor intaan talaabada la qaadin. Ardayga ayaa la siin doonaa shaqo guri inta lagu jiro muddada la cayriyay si uu u dhamaystiro uguna soo gudbiyo macalinka fasalka maalinta uu dib uguusoo laabanaayo dugsiga. Ogoow: Degmada ayaa xaq u leh inay soo jeediso edbin sidaan kasii adag ayadoo lagu salaynaayo nooca xadgudubka

Waa muhiim in ardayga iyo waalidka/masuulku fahmaan in jabinta habdhaqanka laga doonaayo ay keeni karto talaabo edbin ah. Talaabada edbinta ah ee Heerarka I illaa V waa in la sameeyaa si loo xaliyo dhaqan xumida ardayga marka maamuluhu sidaas amro. Maamulaha (ama wakiilkha) ayaa masuul ka ah ku talinta dhammaan tallaabada edbinta, oo ay ku jiraan Ka joojinta Gudaha dugsiga iyo dugsiga/barnaamijka Ka baxsan. Xaalad kasta, su'aasha in falka edab darada ah uu dhacay ama uusan dhicin ayaa fure u noqonaysa talaabada edbinta ah ee uu go'aaminaayo maamul ahaan, maamulaha dugsiga ama sarkaalka eedaha dhagaysanaaya.



Qaabdhismeedka Dugsiyada Wanaagsan waxay:

1. U ogolaaneysaa degmada inay u hormariyaan qaab dhameystiran, oo cilmi baaris ku saleysan taageerada dugsiga iyo la xisaabtanka aqoonsoado una dabaaldago waxa dugsiyada sameeyaan maalin walba. Qaabkeena wuxuu sharxayaan xaqiiqda in ardayda ay yihiin wax ka badan buundada imtixaanka.

2. Siisaa taageero lagu qaabeeeyay dugsiga waxayna kobcisaal xirfada waxbarashada bulshooyinka. In lala xisaabtamo dugsiyada iyo nidaamka dugsiga oo yoolka la wadaagay ee awooda dhismaha si loo xoojiyo guusha ardayga.

3. Ku badeshaa ruuxa tartanka mid ka mid ah iskaashiga iyo in la aasaaso luuqad guud si loo hormariyo.

4. Isu keen xoogaga dugsiyada iyo bulshooyinkooda si loo taageero ardayda inta lagu jiro maalinta dugsiga iyo dhaafsan.

5. Gaarista hormarka waxbarashada sare iyada oo loo diyaarinayo arday walbo ka qalin jabinayo dugsiga dadweynaha Lansing si ay u dhameystiran goobta shaqada ee qarniga 21aad.

Qaabdhismeedka Dugsiyada Weyn

Aaminaada

Qof walba wuxuu ka shaqeeyaa dhinaca yoolka la wadaagay ee lagu hormarinayo natijjooyinka ardayga, u diyaarinta ardayda guusha dugsiga iyo dhaafsan. Dugsiga bulshada oo dhan, waxaa jiro ixtiraam. Shaqaalaha dugsiga, waaladiinta, ardayda iyo maamulayaasha way is qiimeeyaan.

Sinnaanta

Qof walba wuxuu ka shaqeeyaa dhinaca wax ka qabashada sinnaan la'aanta dugsiyadeena iyo natijjooyinka. Ardayda iyo qoysaska ka imaanayo bulshooyinka la heyb soocay inay dareemaan in lagu daray, la ixtiraamo, oo ay u suurtogaleysa gaarista yoolalkeena la wadaagay ee ardayda.

Hogaaminta Dugsiga Wax ku oolka

Maamulayaasha waxay ku hogaamiyaan tusaale oo waxay kobciyaan kobaca xirfada macalimiinta iyo shaqaalaha, hormarinta iyo gaarsinta taageerada waxbarashada iyo bulshada-dareenka ee xoojiyaa guusha ardayga.

Xiriirka Xoogan ee Qoyska-Bulshada

Hogaaminta dugsiga ayaa ka keeno qeyraad bulshada oo soo geliyo dhismaha dugsiga iyada oo la soo dhaweynayo, lagu dhiirogelinayo, oo lana hormarinayo iskaashiyada qoysaska, ganacsiyada, iyo ururada bulshada ku saleysan.

Waxbarashada Adag

Waxbarashada waa la habeeyay, loo dhanyahay, dhiirogelin leh, oo loogu diyaariyay Muhiimada Guud. Heerarka sare ayaa lagu dajiyay fasal walba. Ardayda si firfircooni ayay uga qeybgalaan howsha garaadka hamiga oo hormariyaan xirfadaha-fakarka adag

Jawi Taageero leh

Dugsiga wuxuu aasaasaa fasalka iyo dhaqanka dugsiga meeshaas oo ardayda dareemaan badqab, taageero, oo ay la tartamaan macalimiintooda iyo faca.

Macalimiin Wada shaqeyn leh

Macalimiinta waxaa ka go'an guusha iyo wanaajinta fasaladooda iyo dugsiyada. Waxay haystaan fursada looga qeybqaadanayo hormarinta xirfada ee gudaha dhaqanka ixtiraamka iyo hormarin joogta ah.

Waxaa laga soo qaataay Qaab dhismeedka Waaxda Waxbarashada Magaalada New York ee Dugsiyada Weyn, oo laga soo qaataay cilmi baaris ay sameysay Jaamacada Chicago Consortium ee Cilmi-baarista Dugsiga.

Kaleendarka Degmada

AGOOSTO						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2	3	4	5	
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

SIBTEEMBAR						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
			1	2		
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

OKTOOBAR						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

NUFEEMBAR						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2	3	4		
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

DISEEMBAR						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2				
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

JANAAYO						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
1	2	3	4	5	6	
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

FEEBARAAYO						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2	3	4		
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	29	

MAARSO						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2				
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

ABRIIL						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
1	2	3	4	5	6	
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30				

MAAO						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1	2	3	4		
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

JUUN						
Sabtida	Isniinta	Khamista	Arbacaada	Khamiista	Jimcaha	Sabtida
	1					
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30						

Maalinta Koowaad ee Macalinka
Maalinta Koobaad ee Dugsiga (K-12, ECSE)
Dugsi Ma jiro (Dhammaan)
Maalin Galinkee (Dugsiga Hoose)
Maalin Galinkee (Dhammaan)
Maalin Galinkee Maalin (Dugsiyada Sare)
Bilowga
Maalinta Ugu Danbaysa Dugsiga

Iska diiwaangeli kalendarada dugsiga iyo degmada gaarka u ah ee
www.lansingschools.net

Agoosto

- 23 - Maalinta Koowaad ee Macalimiinta
- 28 - Maalinta Koowaad ee Dugsiga

Sibteembar

- 01 - Ma jiro Dugi
- 04 - Maalinta Shaqada - Ma jiro Dugi
- 29 - Maalinta PD - Ma jiro Dugi

Oktoobar

- 20 - Maalinta PD - Ma jiro Dugi
- 31 - Maalin Barkeed (Dugsiga hoose)

Nufeembar

- 07 - Maalinta Doorashada - Ma jiro Dugi
- 20 - Maalinta PD - Ma jiro Dugi
- 21-24 - Nasiinyada Mahadnaqa Dugi Ma jiro

Diseembar

- 25-29 - Fasaxa Qaboobaha Dugi Ma jiro

Janaayo

- 01-05 - Fasaxa Qaboobaha Dugi Ma jiro
- 15 - Maalinta Martin Luther King Jr. Dugi Ma jiro
- 17 & 18 - Imtixaanka Maalin Galinkee (Dugsiyada Sare)
- 19 - Qorsheynta iyo Diiwaanada Maalinta Barkeed (Dhammaan Dugsiyada)
- 26 - Maalinta PD - Ma jiro Dugi

Feebaraayo

- 19 - Maalinta Madaxweynaha Dugi ma jiro

Abril

- 11 - Imtixaanka SAT iyo ACT WorkKeys Ardayda Sannadka koowaad kaliya A.M. Dhammaan ardayda HS P.M. Maalin buuxdo oo Dugsiga hoose
- 27 - Maalinta Xasuusta Dugi ma jiro

Juun

- 05 & 06 - Imtixaanka Maalin Galinkee (Dugsiyada Sare)
- 07 - Maalinta ugu dambeyso ee Dugsiga Maalin Galinkee
- 08 - Bilaabida

Darin Walter

Iskuduuhaha Title IX

 darin.walter@lansingschools.net
 517-755-2037

Erin Miracle

Title IX Sarkaalka U hogaansanaanta

 erin.miracle@lansingschools.net
 517-755-2010

Title IX walaacyada waxaa sidoo kale loo diri karaa:

 Dugsiga Degmada Lansing
519 West Kalamazoo
Lansing, MI 48933

Waa maxay Title IX?

Ma jiro qof ku nool Mareykanka oo, si ku saleysan galmo, looga reebayo ka qeybqaadashada, ama loo diido faa'idooyinka, ama lagula kaco takoorid sida waafaqsan barnaamij walboo waxbarasho ama howsha lagu helayo caawinta dhaqaalaha Faderaalka.

20 U.S.C. § 1681, et seq.

Qeexida Dhibaateynata Galmaada

Anshaxaan la soo dhaweyn ee qof macquul ah aad ugu darnaado, baahsan, oo meel ka dhac ula kac ah ee si wax ku ool ah ugu diido qofka helitaan simman ee barnaamijka waxbarashada dugsiga ama howsha.

Title IX

Title IX Nidaamka Cabashada

Eedeymahaa Dhibaateynata Galmaada (SH)

Dhacdada Dhibaateynata Galmaada Dhacdo:

- Ma dugsigaa?
- Ma gudaha baskaa/gaadiidka?
- Ma gudaha dhacdada/howsha dugsiga ka faala qaaday?

HAA

MAYA

- miyay darantahay, baahsan, **iyo** meel ka dhac ula kac ah?
- miyay si waxku ool ah ugu diiday helitaanka cowdaha ee barnaamijka dugsiga/degmada ama howsha?

MAYA

Tan ma aheyn Title IX SH

- ku sii soco sida waafaqsan Guddiga Waxbarashada ama Xeerka Anshaxaa, haddii ay quseyso
- Xil ka qaadista Qasabka ah Title IX
- Baaraha/Xeerka Ka duwan

HAA

HAA

Ku sii soco sida waafaqsan Title IX Nidaamka Cabashada

Rasmi ah/Aan rasmi aheyn

- sharciga gobolka SH (ELCRA)
- xoogsheegsiga
- dhibaateynata kale
- muujinta aan ku habooneyn ee kalgacal
- anshax xumida galmaada
- edeb darada

XAD GUDUBKA IYO WEERARKA

Laynka Gurmadka Weerarka Galmada ee Gobalka Michigan
855-VOICES4; (855)-864-2374
ama Fariin qoraal u dir (866) 238-1454
yo TTY (517) 381-8470

Baarahaa Kalkaalinta Weerarka Galmada ee Sparrow (SANE)
(517) 364-3931
Gurmadka Joojinta Rabshada (EVE)
(517) 372-5572

Ururka Firecracker
517-742-7224
Laynka Qaran ee Gurmadka Rabshada Qoyska
1 (800) 799-7233

ADEEGYADA TALO BIXINTA

Adeegyada Caafimaadka iyo Dhimirka ee Carefree
(517) 887-5922

Caafimaadka Dhimirka Bulshada
(517) 346-8318

Deeqaha Carruurta iyo Qoyska
(517) 882-4000

Ele's Place oo loogu talagalay Carruurta Murugeysan
(517) 482-1315

KAHORTA MASIBADA IYO ISDILKA

Caafimaadka Dhimirka Bulshada/ES
(517) 346-8460

crisistextline.org
Fariin qoraal erayga HOME ugu dir
741741

Mashruuca Trevor ee LGBTQIA+
1 (866) 488-7386 ama
Fariin qoraal erayga HOME ugu dir
678678

suicidepreventionlifeline.org
Soo wac 988
ama Oonleen Kala hadal

XAD GUDUBKA DAROOGADA IYO KHAMRIGA

Al-anon iyo Alateen
(517) 484-1977
ama booqo www.al-anon.org

Adeegyada Talo bixinta ee Cristo Rey
(517) 372-4700

Deeqaha Carruurta iyo Qoyska
(517) 882-4000

Adeegyada Soo gudbinta ee SAMHSA
1 (800) 662-4357

ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Xarunta Caafimaadka Ilkaha ee Carefree
1100 W. Saginaw St. Suite 6A
(517) 272-5053
Xogta Central Michigan
Ilaha dhammaan Bulshada
211

Planned Parenthood (Waalidnimada La Qorsheeyay)
Frandor
(517) 351-0550
Xarunta Caafimaadka ee Carefree
1100 W. Saginaw St. Suite 5
(517) 887-5922

Waaxda caafimaadka Degmada Ingham
5303 South Cedar Street
(517) 887-4311 ama booqo hd.ingham.org
Xarunta Caafimaada ee Willow
306 W. Willow Street
(517) 702-3500

ADEEGYADA BAXSADKA/HOOY LA'AANTA

Adeegyada Dhalinta ee Gateway
1 (877) 833-3689

Laynka Gurmadka Carruurta Baxsadka ah
1 (800) 786-2929 ama oonleenka kala sheekayo 1800runaway.org

Filashoooyinka

Muwaadinnimada

Gudigga Waxbarashada ee Dugsiga Degmada Lansing ayaa ka doonaaya ardayda inay u dhaqmaan qaab dhawraaya heerarkooda kobaca, qaangaarnimada iyo awoodaha la muujiyay ayagoo tixgelinaaya xaquuqaha iyo faya qabka ardayda kale, shaqaalaha dugsiga, mutadawiciinta iyo qandaraaslayaasha.

Xeeraka Muwaadinimada ee Dugsiga

Buug yarahaan wuxuu raadinayaan inuu xaqijiyo in xeeraka soo socda ee muwaadinimada la raaco:

1. Ardayda ayaa ka qaybgeli doona dugsiga maalin kasta, ilaalinaaya waqtiga, una diyaar garoobaaya waxbarashada
2. Ardayda ayaa muujin doona qadarin guud, saaxiibtinimo, iyo xushmad ku aadan ardayda kale iyo dadka waawayn
3. Ardayda ayaa u dhaqmi doona qaab muujinaaya ku kalsoonaanta naftooda, qoyskooda, iyo dugsigooda
4. Ardayda ayaa qadarin doona fikradaha, caqidooyinka, iyo dhaqannada dadka kale ayagoo siinaaya dareen niyad furan oo edabsan
5. Ardayda ayaa adeegsan doona luuqada habboon ee qadarinta badan ama ishaarooyin markay la hadlayaan ardayda kale iyo dadka waawayn
6. Ardayda ayaa noqonaaya kuwo wada shaqayn leh, dhiifooyin oo taageero muujinaaya gudaha fasalka iyo hoolka dugsiga
7. Ardayda ayaa gacan ka gaysan doona ilaalinta goob waxbarasho oo leh badqab, saaxiibtinimo iyo wax soosaar
8. Ardayda ayaa naftooda baraaya shaqaalaha dugsiga marka laga codsado

Tallaalada waxaa looga Baahanyahay Gelitaanka Dugsiga Michigan

	Dhammaan ardayda Dugsiga barbaarinta iyo 4-6 sanno ardayda wareejinta hore	Dhammaan Ardayda fasalka 7aad iyo 7-18 sanno jirka ardayda wareejinta
Gowracatada, Teetanada, Xiiqdheerta (DTP, DTaP, Tdap)	4 garoojo DTP ama DTaP 1 garoojo waa inay ahaataa sannadkaas ama 4 sanno jir kadib	4 garoojo xiiqdheerta iyo teetanada ama 3 garoojo haddii ay garoojada 1aad tahay ee lagu siiyay sannadkaas ama kadib 1 sanno da'da ah 1 garoojo Tdap oo 11 sanno jirka ah ama ka weyn markii uu galayo fasalka 7aad ama ka sareeyo
Dabeysha	4 garoojo (3 haddii garoojada 3 aad lagu siiyay sannadkaas ama 4 sanno jirka kadib)	
Jadeecada, Qaama bararka, Jadeecada rubella (MMR)*		2 garoojo oo ama kadib 12 bilood oo da'da ah
Cagaarshow B*		3 garoojo
Caabuqa bakteeriyyaha Ku xiran (MenACWY)	Midna	1 garoojo ee 11 sanno jir ama ka weyn markii gelinta la gelayo fasalka 7aad ama ka sareeyo
Busbuska (Bubus)*	2 garoojo oo ama kadib 12 bilood oo da'da ah, sheybaarka hadda Difaaca, ama taariiqda cudurka busbuska	

*Haddii uu canuga uusan qaadan tallaaladaan, difaaca la qoray waa loo baahanyahay.

Isha: https://www.michigan.gov/-/media/Project/Websites/mdhhs/Folder2/Folder18/Folder1/Folder118/School_Req_for_Parents.pdf?rev=ce1a8f1ee9454802858071afe83dd2a0

Fursada Waxbarashada Loo Siman yahay

Waa xeerka Degmada inay siiso fursad waxbarashada Loo Siman yahay dhammaan ardayda.

Door siinta Waalidka

Markaad tahay waalid ama masuulka ilmaha, doorka aad ku leedahay waxbarashada cunugaaga ayaa:

1. Ka caawi cunugaaga inuu ka guul gaaro waxbarashada tayada sare leh
2. Kordhi ku qanacsanaantaada dugsiga
3. Kordhi niyada macalinka

Hab dhaqan wanaagsan ee qoysaska iyo macalimiintu waxay gacan ka geysataa guusha waxbarashada canuga!

Xaquuqaha iyo Waajibaadka rdayga iyo Waalidka

1. Xeerarka iyo habraacyada dugsiga ayaa loo sameeyay inay u sahlaan arday kasta inuu hela waxbarasho amaan ah, nidaamsan, oo habboon. Ardayda ayaa filan kara xaquuqdooda xoriyatul qawlka iyo abaatulka iyo in si cadaalad ah loola dhaqmo haddiiba ay ilaalinayaan xaquuqahaas ay leeyihii ardayda facood ah iyo shaqaalaha dugsiga. Ardayda ayaa laga doonayaa inay raacaan tilmaamaha macalinka ayna adeecaan dhammaan xeerarka dugsiga u degsan. Habraacyada edbinta ayaa loo sameeyay in la xaqiijiyo hanaanka cabashada (dhagaysiga cadaalada ah) kahor intaan arday looga saarin dugsiga sabab la xariirta habdhqankiisa.
2. Waalidiinta ayaa xaq u leh inay ogaadaan sida cunugoodu uu uga guul gaaraayo dugsiga waxaana xog laga siin doonaa si joogto ah iyo markay u baahdaan, marka walaacyo soo baxaan. Marar badan waxay noqonaysaa masuuliyad saaran ardayga inuu keeno waxbixintaas. Haddii loo baahdo, boostada ama si toos ah u keenista ayaa la adeegsan karaa si loo xaqiijiyo xariirka. Waalidiinta waxaa lagu dhiirogelinayaa inay la dhisaan linkiga labo wado ah macalimiinta canugaaga iyo shaqaalaha taageerada iyadoo la ogeysiinayo shaqaalaha soo jeedinada ama walaacyada laga yaabo inay ka caawiso canuga inuu gaaro yoolalkiisa/yoolalkeeda waxbarashada.



Ka qeybgalka – Ku soo biir Waalidkeena/ Bulshadeena Gollaha La talinta (PCAC)!

Isticmaal codkaaga oo la soco wax ku saabsan dhammaan waxyabaha Dugsiga Degmada Lansing. Ku soo biir shaqaalaha degmada iyo waaladiinta laga bilaabo 6-8:00 pm Arbacada ugu dambeysay ee bil walba!

Kulanka lagu qabtay:
4200 Wainwright Avenue
Lansing, MI 48911

Su'aalah?
Soo wac Xafiiska Dhaqanka Dugsiga
(517) 755-2800





Darin Walter

Title IX Xiriiriyaha

darin.walter@lansingschools.net
 517-755-2037

Erin Miracle

Title IX Sarkalka U hogaansanaanta

erin.miracle@lansingschools.net
 517-755-2010

Dugsiga Degmada Lansing
519 West Kalamazoo
Lansing, MI 48933

Gudigu wuxuu u magacaabayaa shaqsiyaadka kore inay ugu adeegaan siday u kala horeeyaan "Title IX Xiriiriyaha" iyo "Title IX Saraakiisha U hogaansanaanta" ee Degmada. Waxaa hadda kadib loogu yeeraya "Saraakiisha U hogaansanaanta."

3. Ardaydu waa inay dugsiga yimaadaan waqtii sax ah, u diyaar garoobaan waxbarashada ayna ka qaybgalaan barnaamijka waxbarashada. Haddii, sabab jirta awgeed, aan arrintaani suurtagelin, ardaydu waa inuu caawimaad ka raadsado maamulaha, macalinka, ama xoghayaha maamulka dugsiga.
 - i. Ardayda qaangaarka ah (da'da sideed iyo tobant [18] ama ka wayn) waa inay raacaan dhammaan xeerarka dugsiga u degsan.
 - ii. Haddii ay joogaan gurigooda, ardayda qaangaarka ah waa inay ka qaybgeliyaan waalidkood barnaamijkooda waxbarashada.

Xaquuqaha

1. In wax lagu baro goob caafimaad iyo badqab leh
2. Inay ka qaybgalaan hananaka waxbarashada oo lagu bixinaayo jawi ka caagan cabsi, dhibaatayn, cagajuglayn, carqalad iyo rabshad
3. Inay fishaan in xeerarka dugsiga lagu fulin doono qaab joogto ah, cadaalad ah oo macquul ah
4. Si aad u gashid dib u eegida diiwaanada isu geynta ardayga (Ardayda ka yar 18 sanno jir ayaa laga yaabaa inay ka qeybgalaan shir noocaas oo kale; kuwa jira 18 iyo ka weyn ayaa codsan kara shirkha ayagoon waalidkood xaadir ahayn.)
5. Inay fishaan in shaqaalaha dugsigu ay baari doonaan warbixinnaa jabin kasta oo ka dhan ah xaquuqaha ardayga iyo waalidka loogana jawaabo waqtii ku habboon
6. Inaad dib u sameysid dhammaan shaqooyinka aad seegtay sabab la xiriirto maqnaashaha ama ka joojinta dugsiga
7. Inay codsadaan shirkha waxbarashada oo ay la galaan shaqaalaha dugsiga
8. Inay usoo gudbiyaan cabashooyinka, dhacdooyinka, ciladaha, dacwadaha, ama kiisaskooda maamulaha ayna helaan jawaab hore saddex (3) maalmood oo kuwa dugsiga la dhigto ah gudahood kadib marka uu helo maamuluu
9. Inay helaan caawimaado ku aadan arimaha caafimaadka iyo walaacyada, gaar ahaanna ardayda qaba xanuunnada xunxun (tusaale, daawooyinka, baaritaanka badqabka, iyo gacan siinta)

Waa xeerka Gudigga Waxbarashada in la joogteeyo goob waxbarasho oo ka caagan dhammaan noocyada dhibaataynta sharci darada ah, ayna ku jirto dhibaataynta galmada. Degmada dugsigu u dulqaadan mayso dhibaataynta galmada ama noocyada kale ee dhibaataynta sharci darada ah. Balanqaadkaan waxay quseysaa dhammaan howlgalada Dugsiga Degmada, tacliinta

iyo barnaamijyada manhajka dheeraadka ah, iyo howlaha. Dhammaan ardayda, maamulayaasha, macalimiinta, shaqaalahi iyo dhammaan shaqaalahi kale ee dugsiga ayaa wadaagaaya masuuliyada iska ilaalinta, kahortagida, iyo soo sheegida nooc kasta oo dhibaatayn sharci daro ah. Xeerkaan wuxuu qabanayaa falka sharci darada ah oo dhaca inta lagu jiro shaqada waxbarashada ama nashaado ka baxsan manhajka oo uu bixinaayo Gudigga laguna qabanaayo xarunta dugsiga, baska dugsiga ama goob kale haddii falka noocaas ah uu dhaco inta lagu jiro munaasabad ama shaqo uu bixinaayo Gudigga dugsiga.

Qof doonaaya inuu soo sheego xadgudubka ka dhanka ah xeerka dhibaataynta waa inuu la xariiraa: Saraakiisha U hogaansanaanta Ka hortaga Dhibaateyn (ee ku qoran kor).

Dugsiga Degmada Lansing, meesha ku habboon tahay waxay siin dontaa taageero dheeraad ah ardayda lasoo sheegay in loo gaystay dhibaatayn galmo ama weerar galmo. Warbixintaan waxaa ku jira (laakiin kuma koobna) amarada xariir la'aanta ama isbadallada lagu sameeyo jadwallada ardayga si loo difaaco ardayga. Waxaa intaas dheer, degmadu waxay siin doontaa taageero talo bixin ah, taageerada kaabida waxbarashada iyo khayraadka ardayda lagula kacay ama qaybta ka ahaa dhibaataynta ku salaysan galmada iyo/ama qofka dhibaatada gaystay.

Shaqaalahi ku fashilma inay u soo sheegaan dhibaataynta laga shakiyay maamulahooda, kormeeraha, ama Saraakiisha U hogaansanaanta Xeerka ee Degmada ayaa si degdeg ah loo edbin doonaa. Edbinta noocaas ah waxaa kamid noqon kara, haddii duruufaha jira saamaxaan, shaqo ka hakin ama shaqo ka cayrinta shaqaalahi.

Ardayda iyo shaqaalahi ka aargoosta shaqsiyaadka soo sheega dhibaataynta galmada ayaa degdeg loo edbin doonaa. Haddii duruufuhu saamaxaan, edbinta noocaas ah waxaa ku jiri kara hakinta ama cayrinta arday, ama hakinta shaqada ama cayrinta shaqaalahi.

Waajibaadka

1. Inay qadariyaan naftooda iyo dadka kale, iyo sidoo kale degmada iyo hantida bulshada
2. Inay qadariyaan xeerkanka dugsiga ayna ka qaybgalaan nidamayada edbinta marka loo baahdo
3. Inay balan qabsadaan si ay u akhriyaan diiwaannada waqtii dhinacyada dhan aqbali karaan
4. Inay u soo sheegaan jabin kasta oo ka dhan ah xaquuqda ardayga/waalidka shaqaalahi dugsiga
5. Inay soo magaan shaqada ka dhalata maqnaanshaha ama hakinta

Iyo
masuuliyadahaaga



Taageerada Caafimaadka Damiirka

Dugsiga Degmada Lansing wuxuu mudnaanta siiyaa daryeelka Carruurtoo Dhan si ay u hubiyaan in baahiyaha dhameystiran ee ardaydooda la aqoonsado iyo la taageero. Ka go'naantaaan waxaa ka mid ah gelitaanka caalamiga ah ee adeegyada caafimaadka damiirka.

Waxaa laguugu dhiirogelinayaan inaad isticmaashid iskaashigeena ee Care Solace* si loo helo adeegyada gudbinta daaweynta qarsoodiga ah. Care Solace waxaa helayaa marwalba – oo ay ku jiraan habeenada, dhammaadyada isbuuca, iyo fasaxyada – oo 200+ luuqadood ah si loo sharaxo dooqyadaada oo loo xiriiriyo daryeelka.

La xiriir Care Solace

Soo wac ama fariin u dir (888)515-0595
www.caresolace.com/site/lansing

Wixii su'aalo ah?

Xafiiska Dhaqanka Dugsiga
(517)755-2800

* Care Solace ma ahan bixiyaha adeegyada caafimaadka damiirka. Wixii xaaladaha degdega ee nolosha halista ku ah, ka raadi daryeel caafimaad qolka xaalada degdega u dhow, soo wac 911 ama Qadka Ka hortaga Isdilka Qaranka ee 988.

Tixgeli xirashada cagaarka ee Isniinaha oo lagu taageerayo Wacyigelinta Caafimaadka Maskaxda!

6. Inay ka qaybgalaan shirka waxbarashada oo ay la galaan shaqaalaha dugsiga
7. Inay soo gudbiyaan cabashooyinka ayagoo adeegsanaaya habraacyada la dajiyay
8. Inay ku dhaqmaan tilmaamaha la xariira marka ilmaha jiran lagu haynaayo
9. Inay u ekeenaan xogta daawada xafiisyyada dugsiga (tusaale, kalkalisada Dugsiga) ayna ku jirana dukumiintiyada daawada ee muujinaaya baahida kaalmada gaarka ah. (Waa muhiim in foomka Oggolaanshaha daawada ee la buuxshay lana saxiixay oo ku jira diiwaanka daawada dhakhtarku qoray ee dugsiga ama foomka la buuxshay lana saxiixay ee Daawada Qandho jabinta loo keeno dugsiga).
10. Inay eenaan lambarada taleefanka Xaalada Degdega ah oo shaqaynaaya iyo xariirada la isku halayn karo ee xaalada degdega ah marka ardaygu galo.

Faya qabka Ardayda

1. Badqabka ardaygu waa masuuliyad saaran shaqaalaha. Dhammaan ardayda waxaa laga doonayaa inay la qabsadaan habraacyada xaalada degdega ah sida dabka, xirida dugsiga, duufaannada iyo habraacyada soo sheegida shilalka. Haddii arday ogaado xaalad kasta oo daran ama shil, isaga/iyada waa inay ogeysiyaan shaqaale kamid ah dugsiga isla markaba.
2. Sharciga gobalka ayaa ka doonaaya dhammaan ardayda inay haystaan kaarka xaalada degdega ah ee caafimaadka oo uu buuxshay, saxiixay waalid ama masuul, yaallana xafiiska dugsiga. Arday ayaa laga saari karaa dugsiga illaa shardigaan la buuxsho.
3. Ardayda qaba baahiyaha gaarka ah ee caafimaadka waa inay keenaan ogaysiis qoraal ah oo la xariira baahiyaha noocaas ah oo ay la socdaan dukumiintiyada uu baxsho dhakhtarka, loona keeno xafiiska dugsiga.

Wargelinta Lagu laasimay ee Xadgudubka ama Dayacaada Canuga

Dugsiga Degmada Lansing waxay u hogaansamaan Sharciga Illaalada Canuga Michigan wuxuu u baahanyahay dadka qaarkood inay soo sheegaan shakigooda xadgudubka canuga ama dayacaada Adeegyada Illaalada Carruurta. Fadlan arag websaydka Sharciga Michigan iyo Sharciga Illaalada Carruurta - DHS Pub-3 oo wixii warbixin dheeraad ah.

Dhaawaca iyo Xanuunka

1. Dhammaan dhaawacyada waa in loo sheegaa macalinka ama xafiiska. Haddii dhaawucu yahay mid yar, ardayga ayaa la daawayn doonaa wuxuuna ku laaban karaa fasalka. Haddii talaabo caafimaad loo baahan yahay, xafiiska ayaa raaci doona habraacyada xaalada degdega ah ee dugsiga.
2. Ardayga jirada inta lagu jiro maalinta dugsiga inuu codsadaa fasax uu ku tago xafiiska. Qof wayn oo ku habboon oo jooga xafiiska ayaa go'aamin doona in arday uu sii joogo dugsiga ama loo diro guriga. Ma jiro arday laga fasaxaayo dugsiga asagoo waalidka laga helin oggolaansho sax ah.

Xeerka iyo Siyaasada Xadirista

Gudigga Waxbarashada ayaa aaminsan in maqnaanshuhu yahay qayb muhiim u ah guusha ardayga iyo in maqnaansho kasta oo laga maqnaado dugsiga ay keenayso khasaaro waxbarasho oo ku dhacaysa ardayga. Soo xaadidir joogto ah oo xariir ah ayaa laga doonayaa arday kasta oo dhigta Dugsiga Degmada Lansing.

Ayadoo la aqoonsan yahay in ka maqnaanshaha dugsigu muhiim tahay xaaladaha qaarkood, dadaal kasta waa inay sameeyaan ardayda, waalidiinta/masuuliyyinta, macalimiinta iyo maamulayaashu si loo yareeyo maqnaanshaha iyo daahitaanka.

Xadirista ardayga ee dugsiga ayaa ah masuuliyad saaran waalidka/Masuulku iyo ardayga. Si waalidka/Masuulku u buuxsho masuuliyadiisa, dugsigu waa inuu uga waramaa maqnaanshiyaasha ardayga iyo xiliyada uu soo xadiro.

Nidaam ku habboon oo balaaran oo diiwaannada xadirista ah waa inuu leeyahay arday kasta. Macalin kasta ayaa masuul ka ah soo sheegista saxda ah ee xadirista ardayda fasalkiisa maalin kasta. Maamulaha ayaa masuul ka noqon doona xaqiijinta saxnaanshaha dhamaan diiwaannada xadirista dugsigiisa.

Maqnaanshiyaasha, kuwa ay xaqiijiyen waalidku/masuulku, xad dhaafka ah iyo/ama carqlalada ku ah barnaamijka waxbarashada ardayga, waxaa baari doona shaqaalaha degmada dugsiga.

Dhammaan ardaydu waa inay helaan fursad ay kusoo kabaan shaqada dugsiga ee ay u gafeen maqnaanshaha awgiis. Hase yeeshiee, waa masuuliyad saaran ardayga inuu xaqiijiyo layliyada uuna soo cesho gudaha waqtiga uu kula heshiiyay macalin kasta.

Waa shaqada Mashruuca Hormarinta Xadirista ee Dugsiga Degmada Lansing inuu kor u qaado guusha ardayda ayadoo la (foomamkaaga hormarinaayo dhaqanka xadirista wanaagsan, laga shaqaynaayo badalka fikirka lana siinaayo fursadaha waxbarashada loo siman yahay ayadoo la kordhinaayo xadirista ardaya.

Waxaan aaminsan nahay

1. Aqoonsiga iyo yaraynta caqabadaha si loo daboolo duleellada cadaallada.
2. Kor u qaadista kobaca maskaxda ee shaqaalaha, ardayda iyo qoysaska.
3. Kor u qaadista xadirista waqtiga saxda ah oo ah muhiimad wayn.
4. Baahida loo qabo in si wadajir ah aan ula shaqayno qoysaska iyo iskaashatada bulshada.
5. Dhisida iyo joogtaynta dabeecadaha xadirista oo xoog badan xili hore iyo dhammaan xirfada ardayga.
6. Farsamooyinka dhaqan ahaan wanaagsan ee taageeraaya xadirista wanaagsan.
7. Aruurinta iyo adeegsiga cabirada balaaran ee xogta lagu shaqayn karo si aan u adeegsano qaab kala sareeya oo aan u hormarinayso xadirista.
8. Saamaynta ay aadirista wanaagsan ee shaqaaluhu ku leedahay xadirista ardayga.
9. Dhiiri gelinta iyo u dabaal degista xadirista hormarka laga sameeyay.

Xaadrista iy Maqnaanshaha Ardayga

Ardayda waxaa laga doonayaa inay yimaadaan dugsiga kahor intaan dugsiga la bilaabin maalin kasta. Muhiimada xaadiris joogto ah ayaa ah cashar wayn oo ay tahay in dugsiga lagu barto. Waxbarashada ayaa fasalka ka socota maalin kasta. Khibradahaan waxbarashada marna lama jumlayn karo. Marka ardaydu soo xaadiri waayo, wuxuu waynayaa qayb muhiim u ah waxbarashadiisa.

Ardayga fasalada K-12 ayaa oo aqoonsadaa mid maqan marka uu imaan waayo cashar buuxa. Ardayga ayaa soo daaha marka uu kasoo daaho illaa 15 daqiico xiisada casharka. Ardayda ayaa loo arkaa Mid Soo daahay (AL) marka uu yimaado kadib 15 daqiico billowga xiisada casharka. Ardayda ka baxa xiisada casharka kahor xiliga la qorsheeyay aana soo laaban ayaa loo aqoonsanayaa Kuwo Casharka oon dhamaan Ka tagay (LE).

Ma la Fasaxayaa Maqnaanshaha Cunugaya?

Maqnaansho ayaa la ogol yahay haddii ogaysiis uu dugsigu helo tobant (10) maalmood oo kuwa dugsiga ah kadib maqnaanshaha waxaa sabab u ah hal ka mid ah kuwa xiggo:

- Xanunka Waalidku Soo sheegay (oo dhan illaa ayna ku jiraan 10 jeer sannadkii) Maqnaanshaha kadib 10 sannadkii, ayaan la oggolaan doonin ilaa in la keeno maahee cadaynta caafimaadka (dhakhtarka)
- Tacsiyada
- La xiriirto Dugsiga (ka joojinada, baska daaho, safarada dalxiiska, iwm.)
- Xaadrista Maxkamada Sharciga
- Xabsi dhigista
- Sababta Caafimaadka (Dhakhtarka)
- Kormeerada Arimaha Diinta

Habraacyada Fasallada K-6

1. Waalidiinta/masuuliyiinta sharciga ah ayaa masuul ka noqon doona la xariirida xafiiska dugsiga haddii ardaygu uu maqnaan doono. Natijjooyinka xariirkaas ayaa lagu qorayaan diiwaanka ka qeybgalka rasmiga ah.
2. Shaqaalaha dugsiga ayaa la xariiri doona guriga haddii waalidka/masuulka

sharciga ah uusan soo wicin si uu u xaqijiyo sababta maqnaanshaha (maqnaashooyinka) ardayga. Natijjooyinka xariirkaas ayaa lagu qorayaan diiwaanka ka qeybgalka rasmiga ah.

3. Marka ardaydu ay kasoo laabtaan maqnaanshaha. waxaa looga baahanyahay inay keenaan ogaysiiska saxiixan ee ka yimid waalidka/masuulka sharciga ah oo sheegaaya sababta maqnaanshaha (maqnaashooyinka).
4. Shaqaalaha dugsiga ayaa la xariiri doona waalidka/masuulka sharciga ah marka ardaygu uu maqnaado shan (5) maalmood oo buuxa (toban [10] nus maalmood).
5. Ardayda maqnaada wadarta guud ee sideed (8) maalmood oo buuxa (lix iyo tobant [16] nus maalmood) ayaa loo gudbin karaa taqasuslaha Xaadrinta ee Degmada.
6. Marka ardaydu ay dhaafaan tobant (10) maalmood oo buuxa oo ay maqnaayeen (xanuun ama codsiga qoyska), ogaysiiska saxiixa oo kasoo baxay dhakhtarka ardayda ayaa loo baahan yahay. Bayanka waa inay ku jirtaa sababta maqnaanshaha, tirada maalmaha iyo taariiqda (taariiqaha) uu ardayga ka maqnaanayo, iyo saxiixa dhakhtarka.
7. Kahor intaan loo gudbin taqasuslaha Xaadrinta, waraaq ayuu dirayaa dugsigu si loogu sheego waalidka/masuulka sharciga ah ciladaha xadirinta ee ardayga.
8. Haddii dhammaan dadaallada kore ay ku fashilmaan in la xaliyo cilada xadirista, Khabuurka Xaadrista ayaa qaadi doona talaabada sharciga ah ama kale ee ku habboon oo ka dhan ah waalidka.

Habraacyada Fasalada 7-12

Maqnaansho ayaa la ogol yahay haddii ogaysiis uu dugsigu helo tobant (10) maalmood oo kuwa dugsiga ah kadib maqnaanshaha waxaa sabab u ah mid ka mid ah sababaha ku qoran bogga 13 aad.

1. Waalidiinta/masuuliyiinta sharciga ah ayaa masuul ka noqon doona la

xariirida xafiiska dugsiga haddii ardaygu uu maqnaan doono. Natijjooyinka xariirkaas ayaa lagu qorayaan diiwaanka ka qeybgalka rasmiga ah.

2. Marka ardaydu ay dhaafaan tobani (10) maalmood oo buuxa oo ay maqnaayeen (xanuun ama codsiga qoyska), ogaysiiska saxiixa oo kasoo baxay dhakhtarka ardayda ayaa loo baahan yahay si loo fasaxomaqnaanshiyaasha kale. Bayaanka waa inay ku jirtaa sababta maqnaanshiya, tirada maalmaha ardaydu maqnaan doono, taariikhaha maqnaanshiya iyo saxiixa dhakhtarka.
3. Macalinka ayaa u sheegi doona maamulaha dugsiga ama wakiilkiisa marka ardaygu uu gaaro tobani (10) maqnaanshiyo (la fasaxay ama aan la fasixin) ama marka dhacdooyin maqnaansho oo aan ardayga lagu aqoon ku yimaadaan xiisada casharka inta lagu jiro simistar, dugsiga ayaa u sheegi doona waalidka (i-meelka, taleefonka, ama qof ahaanta).
4. Haddii dhammaan dadaallada kore ay ku fashilmaan in la xaliyo cilada xaadista ardayguna uu ka yar yahay da'da 18 sano jir, Khabirka Xaadista ayaa qaadi doona talaabada sharciga ah ama kale ee ku haboon oo ka dhan ah ardayga iyo waalidka/masuulka. Haddii ardaygu u dhixeyyo da'aha 16 iyo 18 sano jir, waalidiinta ayaa ardayga kasoo qaadi kara dugsiga ayagoo saxiixaaya foomka Ogolaanshiya Ka bixinta Dugsiga ayadoo uu joogo maamulaha dugsiga. Foomkaan ayaa laga heli karaa dugsiyada saro oo dhan.

Adeegyada Guriga lagu Baxsho

Haddii cunugaaga uu ka helo dhakhtarkiisu xanuun caafimaad oo ka hor istaagaaya inuu dugsiga xaadiro (5 maalmood ama ka abdan), waxaad u qalmi kartaa adeegyada guriga lagu baxsho.

Waa maxay Adeegyada Guriga lagu Baxsho?

Dugsiga Degmada Lansing waxay bixisaa adeegyada Guriga lagu Baxsho oo la siyo ardayda qaata daawaynta caafimaadka ee ka hor istaagaysa inay dugsiga toos u xaadiraan. Iaydoo loo marayo isticmaalka shaqooyinka, qoraalada buugga, iyo/ama illaha onleenka oo uu bixiyay fasalka dugsiga, macalimiinta macalimiin shahaadeysan ee guriga waxay bixiyaan caawinta waxbarashada ee guriga ardayga.

Shuruudaha Uqalmida:

Si uu ugu qalmo adeegyada Guriga lagu Baxsho, cunugaagu waa inuu:

- Qabaa ogaanshaha caafimaad ee ka hor joogsado ka qeybgalka waqtiga buuxo
- Waa inuu haysto foomka dhakhtarka oo kasoo baxay xirfadle caafimaad oo u qalma (M.D., D.O. ama Kaaliyaha Dhakhtarka oo Shahaado haysta)
- Waa inuu sabab caafimaad dugsiga uga maqan yahay shan (5) maalmood oo xariir ah
- Waa inuu ka diiwaan gashan yahay Dugsiga Degmada Lansing

Awooda Wada Shaqaynta

Macalimiinteenaa adeegyada guriga lagu baxsho ayaa la shaqeeyaa macalinka fasalka cunugaaga si ay u bixiyaan agabka loo baahan yahay iyo layliyada ardaygaaga. Macalinka fasalka canugaaga wuxuu ahaanayaa macalinka diiwaanka canugaaga.

Macalimiinta Adeegyada Guriga lagu baxsho ayaa:

- Adeegyada la mudaynaaya waalidka
- Siinaaya taageero cashar ayagoo siinaaya layliyo, buugaagta akhriska, iyo ilaha macalinka ardayga guriga wax lagu baraayo
- Kusoo celinaaya shaqada ardaygu dhameeyay dugsiga
- U dhexayn doona qoyskaaga iyo dugsiga cunugaaga

Sidee ayaan Ku diiwaan Gelinaya Cunugayga?

1. Ka codso oo u dir foomka soo gudbinta ardayga dugsigaaga. La taliye ama maamule dugsi ayaa buuxin doona markas foomka gudbinta ee dugsiga u diraya labadaba xafiiska Dhaqanka Dugsiga (OSC).
2. La taliyaha dugsiga ayaa kadib helayo foomka gudbinta dhaqtarka oo loo gudbiyo dhammaan sadexda foom Xafiiska Xisaabinta Ardayda iyo Diiwaangelinta Dhixe (PACE) oo ansixinta ugu dambeysay. Waxaa laguugo soo ogeysiinaya isbuuc gudahiisa oo gudbinta haddii/goorta adeegyada guriga ku saleysan la siinayo.

Ma garaneyaa
ardayga LSD kaasoo
wadaagayo guriyeynta
dadka kale ama iyadoon
jirin wax guriyeyn ah?

F.O.R.T. Barnaamijka
waxaa laga yaabaa inay u
suurtogasho inay caawiyaan!



Gudbi kalsooni
codsiga maanta!



Ma ahan qeyb ka mid ah
qoyska weli?
Iska diiwaangeli Hadda!
www.enrollinlansing.com

Carruurta Guri la'aanta iyo Dhalinyarada

Xeerka Waxbarashada Guri la'aanta McKinney-Vento waxay hubiyaan xaquuqaha waxbarashada oo carruurta iyo dhalinyarada la kulmayaan guri la'aan. Yoolka koowaad waa xasilinta waxbarashada.

Yeerkha wuxuu qeexaa ardayda guri la'aanta sida kuwa oo:

1. La'aanta deegaan go'an, joogto ah, oo ku filan habeenkii;
2. La wadaag guryaha dadka kale, ee ku nool albeergooyinka, huteelada, darjiinada tarooliga, ama garoonnada xeryaha sabab la xiriirto la'aanta hoy ku fillan; ku nool yihiin hoy degdeg ah ama ku meel gaar ah;
3. Hayso daganaanshaha koowaad ee habeenkii oo ah meel dadweyne ama gaar ah oo aan loogu tallogelin ama aanan si caadi ah loo isticmaalin sida hoyga hurdada hoogtada ah ee aadanaha;
4. Ku noolow baabuurta, darjiinada, meelaha dadweynaha, dhismooyinka la dayacay, guryo aan tayadooda wanaagsaneyn, saldhigiyada baska ama tareenada, ama goobo la mid ah;
5. Miyay tahriibayaasha iyo ku noolaanshaha xaaladaha lagu dajiyay sida waafaqsan 2-4 ee sare.

Ardayda guri la'aanta waxay leeyihiiin xuquuqaha waxbarashada qaarkood oo waxay awoodaan: inay iska diiwaangeliyaan iyadoon laga daahin dugsiga (aagga ama dugsiga asalka) iyadoon jirin cadeynta deganaanshaha ama ciwaan joogto ah, tallalka, diiwaanada dugsiga, ama dukumentiyada kale ama marka dukumentiga la helayo; kala dooro dugsiga deegaanka ay ku nool yihiin ama dugsiga ugu dambeeyay ee ay dhigteen ka hor intaysan noqon guri la'aan, markii uu codsado waalidka/masuulka oo ay go'aansatay degmada inay macquul noqoto iyo danaha ugu fiican ee ardayga; dhigtaan dugsiga oo ka qeybqaataan barnaamijyada dugsiga carruurta guri la'aanta; oo ay helaan dhammaan adeegyada dugsiga ee loo heli karo ardayda kale oo ay ku jiraan adeegyada gaadiidka, adeegyada waxbarashada gaarka ah meesha ay quseyso, iyo adeegyada kale ee taageerada (cuntada, guriyeynta, dharka, iwm.).

Wixii warbixin dheeraad ah ee la xiriiro adeegyada guri la'aanta,
oo ay ku jiraan hubinta u qalmidaada iyo diiwaangelinta, la soo xiriir

Qoyaska ka Adkaanayo Waqtiyada Adag (FORT) Qadka caawinta (517)755.2813

Xoriyatul Qawlka Ardayda

Dugsigu wuxuu aqoonsan yahay xaqquqda ardaydu u leeyihii xoriyada hadalka. Ayadoo xaqa xariyada hadalku leeyahay masuuliyad u baahan in si sax ah loo adegesado. Ardayda ayaa qaybin kara ama soo bandhigi kara, xiliyada ku habboon, agabka aan la maal gelin, ee aan ganacsiga la xariirin iyo dacwadaha; batoonnada, calaamadaha, ama astaamaha kale; dharka, insignia, iyo boorarka; iyo agabka codka iyo muuqaalka. Dhammaan alaabuhu waa inay buuxshaan tilmaamaha soo soca ee dugsiga:

1. Qoraal lama muujin karo haddii ay:
 - i. khalad ku tahay ilmaha yaryar, wax calaamadayanayo, dhacdo, ama hadal xun
 - ii. ay caqabad ku tahay badeeco ama adeeg aan sharcigu u ogolayn carruurta
 - iii. ay tahay mid cay ama dhibaatayn ah
 - iv. ay abuuraysa dagaal ama keenayso suuragalnimada carqalad ku dhacda dugsiga ama munaasabada
 - v. ay keenayso suuragalnimada muuqada ee taagan ee ah in, midkood sabab la xariirta mawduuceeda ama nooca qaybta ama bandhiga, ay abuurto ama keenayso inay abuurto agab iyo carqalad wayn oo ku dhacda dugsiga ama shaqooyinka dugsiga, jabinaya sharciyada dugsiga, ama keenayso fal sharci doro
2. Agabka lamasoo bandhigi karo ama lama qaybin karo inta lagu jiro xiisadaha ama inta lagu jiro waqtiyada fasalada loo kala wareegaayo. Ogolaanshaha waxaa loo bixin karaa bandhiga ama qeybinta inta lagu jiro muddooyinka qadada iyo dugsiga kadib oo goobaha loogu tallogalay, haddiiba aanan ka bixitaanada la xerin oo ay jiraan gelitaanka ku haboon iyo ka bixida dugsiga.

Ardayda aan hubin in agabku ay doonayaan inay soo bandhigaan uu buuxin karo ama uusan buuxin karin tilmaamaha dugsiga ayaa u keeni kara maamulaha dugsiga labaatan iyo afar (24) saac kahor intaysan soo bandhigin.

Walaacyada Ardayda, Tallooyinka, iyo Cabashooyinka

Dugsigu wuxuu u taagan yahay faa'idada ardayda. Shaqaaluuhu waxay u joogaan inay arday kasta ka caawiyaan noqoshada qof wayn oo masuul ah. Haddii ardaygu hayo tallooyin kor u qaadi kara dugsiga, isaga/iyada waa inay dareemaan xoriyad ay ku bixiyaan. Tallooyinka qoraalka ah ayaa toos loogu diri karaa maamulaha ama maamulka ardayga.

Marka walaacyada ama cabashooyinku soo baxaan, qaabka ugu fiican ee loo xaliyo arinta waa in loo maro wada hadal. Ma jiro arday uu dhibaatayn karo shaqaale ama cabsida aangoosiga sabab la xariirta inuu fikriisa xogtada ah kusoo gudbiyay walaaca uu qabo. Tallooyinka kasta, walaacyo, ama cabashooyinka waxaa loogu diri karaa maamulaha ama maamulka ardayga.





Maaskarooyinka Wajiga

Haddii ardayga doorto inuu xирто maaskaro, kuwa xiggo ayaa quseeyo: Maaskarooyinka Ski, maaskarooyinka qoorta daboosh, ama safaleetiga loo xирто sida maaskaraha wajiga lama ogola. Maaskarooyinka waa inay raacaan tilmaamaha CDC iyo qaabka lagu talliyay.



* Maamuaha ayaa awood u leh inuu ogolaado xirashada jaakadaha.

Buug yaraha Labiska Degmada oo Dhan

Dharka lagu xiranaayo dugsiga waa inay noqdaan kuwo ku le'eg oo nadiifah. Si loo joogteeyo goob caafimaad, badqab iyo nidama leh, waa in kabو la gashtaa. Kabo khatar badqab ku keeni kara ardayda, sida kabaha taatirada leh, waa mamnuuc. Kabaha sida dacaska iyo kabaha cirbaa dheer ayaa laga digayaa, laakiin waa la xiran karaa marka waalidku go'aansado. Dharka kor laga gashto sida jaakadaha*, koofiyadaha ama madax gashiga (marka laga reebo kuwa diinta ama sababo caafimaad loo xidho), jaakadaha iyo ookiyalaaha aan dhakhtarku qorin waa inaan lagu xiran gudaha dhismaha dugsiga.

Dharka waa inaysan muujin, dharka ama qafiif ah, cayda ama muujinayo aflagaado, falal sharci daro ah ama walxaha sharci darada (sida, alkulada, deroogada, tubaakada, iwm.), erayada cayda ah ama sawirada, ama astaamaha gaaniska, calaamadaha ama fariimaha. Ardayda ma xiranayaan silsilada boorsada culus ama weyn ama jijinta biraha gacanta. Calaamadaha ama qurxinta fariimaha soo saara ama tilmaama hay'adaha lagu yaqaan inay si xun ula dhaqmaan dadka iyadoo lagu saleynayo jinsiyad, qowmiyad, asalka dhalashada, midabka, jinsiga, nooca galmeda, da'da, diinta, ama naafanimada maskaxda ama jirka, ayaa sidoo kale waa mamnuuc ah.

Dharka aan la aqbali karin waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, dharka yoo-yooga, dharka soo bandhigaaya shafka ama xabadka, funaadaha jirka muujiya, shaararka murqaha (illaa in qofku kasoo xiran yahay maahee funaanad), daliimaha isbageetiga, dharka jilicsan iyo buumoooyinka sidoo kale sida dabagaabyada/sarwaalada ku fariista hoosta dhexda oo muujinayo kastuumada ama maqaarka muuqdo. Dabo gaabyada ama surwaallada jeexan lama ogola. Saraawiisha/dabagaabyada waa inay kor iqtiyarkooda ugu dhaganaadaan iyadaan loo isticmaalin gacanta. Dharka waa inay gabi ahaanba ka daboolaan ardayda gadaal markii ay qaloocsamayaan.

Ardayda, oo kaashanaaya waalidkood, ayay masuuliyad ka saaran tahay inay u labistaan iskuna qurxiyaan naftooda qaab ku haboon dugsiga. Si kastaba, fasiraada dharka waa go'aaminta maamulka dugsiga oo qaab is waafaqsan, cadaalad, oo macquul ah.

Buug yaraha Ardayda ee Hawlaha ka baxsan Manhajka

Ardayda iyo martidooda ee ka qeygalayo munaasabadaha la xariira dugsiga waxaa qabanaaya Buug Gacmeedka Dugsiga Lansing waxaana la marsiin karaa talaabo edbin ah, ayna ku jirto in laga saaro koox haddii ay jabiyan xeerka Buug gacmeedka.

Tababarayaasha ama maal geliyaasha gaarka ah ayaa dejin kara noocydheeraad ah oo xeerar ay tahay inay raacaan ka qaygalayaashu ah kahor intuusan ogolaan maamuluuhu. Haddii xeer la dajiyo, xeerkku waa inay yihiin kuwo qoraal ah waana in la siiyaa ka qaygalayaasha kahor xiliga shaqada. Nuqullada xeerkarka oo uu saxiixay ka qaybgale kasta iyo waalidka waa in loo geeyaa xafiiska maamulaha.

Qaybinta Dukumiintiyada Qoraalka ah

Keliya waxyaabaha uu ogolaado maamulaha ayaa lasoo bandhigi kara aama boorka lagu dhain karaa.

Maamulaha ama wakiil kiisa ayaa abuuri doona waqtiyo iyo goobo cayiman oo lagu qaybsho alaabaha daabacan ee ardaydu keento. Dhammaan agabka la qaybso waa inay muujiyaan magaca cida keentay ama ururka laguna sheegaa oqraaga ama daabacaha.

Maamulaha ama wakiilkiisa ayaa la wareegi kara agab kasta oon horay loo fasixin.

Xeerarka loo Isticmaalo Aaladaha Isgaarsiinta Elektarooniga ah

ECD yada ayaa dhammaan ah aalado oonleen ah oo loo adeegsado in la iskula xariiro iyo dadka kale oo ay ku jiraan, laakiin kuma koobna taleefannada gacanta, iPad yada iyo kumbuyuutarada shaqsiga ah. U addeegsiga ECD yada qaab sharci daro ah ayaa keenaysa talaabo edbin ah, ayna ku jirto in lala wareego, ayadoo ku xiran nooca falka mamnuuca ah iyo/ama haddii ardaygu ku ceshay falka khaladka ah. Maamulka ayaa xaqq u leh inay wax ka badalaan cawaaqibyada sida ku haboon. ECD yada waa in loo dhiibaa maamulaha ama Madaxa Badqabka Bulshada marka uu codsado.

Adeegsiga khaldan ee aladaha ECD yada ayaa gabii ahaanba mamnuuc ah. ECD yada lama "shidi karo" ama haddii kale laguma adeegsan karo qolalka alaabaha la dhigto ama musqluhu, haddii ay tahay halkaan ama degmo dugsiyed kale oo shaqada dusiga ama munaasabad ciyaar ah ka dhacayso. Aalad kasta oo noocaan ayaa lala wareegi doonaa ardaygana waxaa la marsiin doonaa talaabo edbin ah.

Ardayda adeegsada ECD ayaa qaadan doona masuuliyada daryeelkeeda.

1. Ma jirto mar Degmadu masuul ka noqonayso ka hortaga xatooyada, luminta, dhaca ama waxyeelada ECD yada la keeno dhismaha dugsiga iyo/ama basaska. Ardayda iyo waalidiintooda ayaa si wayn loogu boorinayaa inay xaqiijiyaan in, haddii ardaydu wataan ECD yada, waa inaysan dhigin meel ayagoon la waardiyaynayn ama amaan ahayn.
2. Mar kasta, oo adeegsiga aaladaha xariirkha oonleenka, ama baraha bulshada ay dhibaato, anjabaad abuuraan ama haddii kale keenaan goob colaadeed inuu noqdo dugsigu, ama carqalad gashaan goobta waxbarashada waxaa la marsiin doonaa talaabada edbinta ah. Talaabadaan ayaa u dhaxayn doonta la wareegista aalada oo illaa in ardayga laga hakiyo waxbarashada dugsiga.

Ugh, the Student Handbook is SO boring. 😂👎

Jooji fariin qoraalka aad iisoo dirto inta casharku socdo... 😕



Si khaldan u Isticmaalka ECD yada ayaa keeni karta...

Dambiga 1aad Aalada waa lala wareegayaa oo waxaa loo celinayaa ardayga dhammaadka maalinta.

Dambiga 2aad Aalada waa lala wareegayaa, waalidka/masuulka ayaa loo sheegayaa inuu ka soo qaado aalada dhammaadka maalinta, iyo mudnaanta ECD waa lagala laabtaa.

Danbiyada Soo laalaabta Aalada waa lala wareegayaa talaabo kale oo edbin ah ayaa la qaadayaan taasoo dhan ayna ku jirto in ardayga fasalka laga saaro.



Isticmaalka Tignooloojiyada iyo Xeerarka Badqabka

Ku adeegsiga tignooloojiyada gudaha Dugsiga Degmada Lansing ("Degmada") waa asxaan loo samaynaayo ardayda. Asxaankaan wuxuu wataa masuuliyada u adeegsiga tignooloojiyada qaab waafaqsan buuga Xeerka iyo sidoo kale waafaqsan sharciyada iyo qawaaniinta. Adeegsiga tignooloojiyadu waa inuu u hogaansan yahay shaqada degmada waxaana loogu talagalay keliya kor u qaadista hormarka waxbarashada. Tejnoolojiyada waxaa laga wadaa, laakiin kuma koobna, ECD yada, fariin codeedka, hardware ka kumbuyutarka, software ka iyo agabka kaabayaasha ah, aaladaha kumbuyutarka ee gacanta lagu qabto, aaladaha wax xisaabsha, qalabka sayniska, taleefishinnada, iimealika, ilaha intarneedka iyo khadka interneedka.

Xeerarka Tignooloojiyada ee Fassallada K-6

1. Ardayda ayaa keliya adeegsan doona aaladaha korontada ku shaqeeya marka uu u fasaxo macalinka ayna raacaan dhammaan tilmaamaha macalinka ee adeegsiga,
2. Ardaydu marna ma siinayaan qof ku jira interneedka magaciisa, magaca dugsigiisa, ciwaanka guriga ama lambarka taleefanka,
3. Haddii ardaydu helo xog ku jirta ECD ga oo ardayga niyad xumaysa, ama uu ogyahay inay khalad tahay, ardaygu waa inuu u sheegaa macalinka,
4. Haddii ardayga uu helo fariin aan wanaagsaneyn oo uu dareensiyo ama ay dareensiiso xummaan, ardayga ayaa u sheegayo macalinka islamarkaas oo AAN ka jawaabin fariinta,
5. Marka ardaygu isticmaalo ECD, ardayga ayaa noqonaaya mid aad u taxadar badan si uusan u jabin ama u waxyelayn qaybaheeda,
6. Ardaygu masoo degsan doono, rakiban doono, ama haddii kale adeegsan doono softweer aysan oggolaan Waaxda Tignooloojiyada. Tan waxaa ku jira, laakiin kuma koobna sofweer kasta ama barnaamij lagasoo dejiyay CD, xanbaare ama laga helay interneedka.

Xeerarka Tignooloojiyada ee Fassallada 7-12

1. Ardayga ayaa u adeegsan doona ECD ujeedooyinka waxbarashada ee la ogolaaday keliya,
2. Asagoo aqoonsanaaya in adeegsiga ECD ay tahay asxaan, ardayga ayaa aqbalaaya masuuliyada daryeelka saxda ah ee dhammaan tignooloojiyada loo ogolaaday,
3. Ardayga ayaa ilaolinaaya dhammaan ciwaannada iyo baasweerada la siiyay lamana wadaagi doono ardayda kale, shaqaalaha ama martida. Kuwaan waxaa ku jira baasweerada iimealka iyo khadka interneedka,
4. Ardaygu marna lama wadaagi doono xogtiisa shaqsiga ah baraha interneedka,
5. Waxaa intaas dheer, haddii ardayga laga codsado xogta shaqsiga ah ama la dhibaateeyo qaabay tahayba, wuxuu aqbalayaa inuu arrintaan degdeg ugu sheego macalinka ama shaqaale kale,
6. Ardaygu masoo degsan doono, rakiban doono, ama haddii kale adeegsan doono softweer aysan oggolaan Waaxda Tignooloojiyada. Tan waxaa ku jira, laakiin kuma koobna sofweer kasta ama barnaamij lagasoo dejiyay CD, xanbaare ama laga helay interneedka,
7. Ardaygu wuxuu ku dhaqmi doonaa dhammaan sharciyada xaquuqda daabacaada.

Xeerarka iyo Sharciyada Habdhaqanka Badqabka Baska Dugsiga

Dhammaan xeerarka Buug yaraha Dugsiga Degmada Lansing ayaa qabanayo ardayda ah rikaabka baska dugsiga. Waxaa intaas dheer, xeerarka soo socda ee gaarka ah waa in la dhawraa sabab la xariirta shuruudaha badqabka ee gaarka ah ee ku xiran wadista baska, arday kasta oo jabiya xeerarkaan ama gala falal kale oo anshax daro ah dusha baska ayaa waji kara digniinta anshaxa oo qoraal ah iyo/ama ogaysiiska ka hakinta adeegga. Arday dugsiga laga hakiyay waa inuu helaa oggolaansho kasoo baxa maamulaha kahor intaan loosoo celin faa'iidada raacista baska.

1. Darawalka baska ayaa masuul ka ah badqabka baska dugsiga iyo rakaabka. **Ardaygu waa inay la shaqeeyaan ayna amarkiisa qaataan darawalka markasta.** Si loo hubiyo badqabka darawalka iyo rakaabka, ardayda waxaa mamnuuc ka ah inay soo gaalaan dhalo ama waxyabo kale oo loo adeegsan karo hub ahaan (tusaale, kubada baseball ka, iskuutar, looxda lagu ordo, iwm.) oo ay lasoo fuulaan baska dugsiga.
2. Korista iyo ka dagashada baska dugsiga waxaa maamulaaya darawalka. iyo shaqaalaha dugsiga.
3. Albaabka bixitaanka xaalada degdega ah ayaa la adeegsan doonaa keliya marka darawalku amro waana inaan la taaban xili.
4. Ardaydu waa inay yimaadaan astaankooda baska shan (5) daqiiqo kahor xiliga ay baska raaci lahaayeen ayna ku sugaan aaga amaanka ah oo ka baxsan wadada. Ardayda ayaa baska u galaaya qaab nidaamsan wayna sii fadhin doonaan si dagan ilaa laga gaar waqtiga ay ka daganayaan baska. Madaxyada iyo gacmaha ayaa lagu hayn doonaa gudaha daaqadaha baska; lugaha lama dhigan karo bartamaha meesha la maro ee baska iyo sagxada xili kasta. Ardayda waxaa lagu amri doonaa inay joogsadaan ayna eegaan labada dhanba kahor inta aadan ka gudbin wadada horta baska dugsiga.
5. Darawalka ayaa ka dooni kara ardayda inay fariistaan kuraas gaar ah markasta oo loo baahdo wuxuuna abuuri karaa shaxda fadhiga sababtaas.
6. Xogta ku saabsan astaannada baska iyo jadwallada waqtiga ayaa loo diri doonaa ardayda u qalma kahor inaan sannad dugsiyeedka la furin.
7. Ma jiri doonaan xayawaanka rabaayada ah ama xayawaanno kale oo loo ogol yahay baska.
8. Keliya ardayda fasaxa haysta ayaa loo ogol yahay baska.
9. Martidu ma raaci karaan baska dugsiga, tusaale ardayda inay isqorana raba, waalidiinta, ardayda aan dhigan Dugsiga Degmada Lansing
10. Wadooyinka baska dugsiga, astaannada iyo jadwallada waqtiga waxaa abuuri doona Gaadiidka Dean. Isbadelo kasta oo lasoo jeedsho waxaa lagala hadli doonaa Madaxa Shaqooyinka ee Dugsiga Degmada Lansing.



Habraacyada Habdhaqanka Badqabka Baska Dugsiga

Digniinaha iyo Hakinnada

Wadista baska dugsigu waa asxaan, maaha xaquuq. Waa muhiim in ardaydu raacaan heerka anshaxa badqabka leh intay saaran yihiin baska dugsiga. Darawalka baska ayaa lahaan doona awood uu kusoo saaro digniinta ashaxa ee qoraalka ah ama soojeedinta in arday laga saaro baska kaasoo jabiyyay xeerarka Buug yarahaan ama garay fal kale oo anshax daro ah.

Soo saarista Digniinta Habdhaqanka Xun

Darawalka ayaa soo saari doona digniinta qoraalka ah ee anshaxa, haddii danbigu uu yahay mid daran illaa uu ka abuuro khatar socota oo ku dhacda badqabka baska iyo ardayda saaran. Haddii habdhaqan aad u xun lagu kaco, cogsiga hakinta ayaa loo dirayaa maamulaha.

Soo saarista Ogaysiisyada Hakinta

Nuqulka digniinta anshaxa baska ayaa loo gayn doonaa waalidka waxaana u gaynaaya ardayga. Foomka waa inuu saxiixaa waalidka uuna u keenaa darawalka baska asagoo ugusoo dhiibaaya ardayga xiliga xigta ee uu raacaayo baska.

- 1.** Maamulaha ayaa masuul ka ah hakinta baska.
- 2.** Ardayga la laalo masaaliixdiisa bas raacida ma awoodi doono inuu baska fuulo muddada hakintu socoto. Darawallada ayaa soo xaadiri doona shirarka waalidka marka maamuluhu ka cogsado. Ardayga subixii laga hakiyyay baska subixii ayaa guriga lagu gayn doonaa baska galabtii.
- 3.** Ardayga waxaa laga hakin doonaa baska dhammaadka shaqad abaska. Kiisaska aadka u daran ee carqada wayn ka jirto, ardayda dugsiga sare ayaa laga mamnuuci karaa wado gaar ah. Hakinnadaas wadada ayaa degdeg loogu sheegi doonaa maamulaha waxaana u sheegaaya darawalka. Marka arday laga hakiyo raacida baska asagoo dugsiga jooga, waa masuuliyad saaran maamulaha inuu la xariiro waalidiinta ayna diyaarshaan sida ardaygu ku tagaayo guriga kadib marka casharadu dhamaadaan. Ma jirto xili ardayga la dhahaayo u lugee guriga ayadoo uusan ogayn uusana fasixin waalidku. Arday laga reebay inuu raaco baska gaynaya kana keenaaya dugsiga ayaa heli doona jadwalka caadiga ah ee gaadiidka degmada dugsigu u diyaarisay safarada gaaban, nashaadaadka ka baxsan manhajka iyo hawlaha kale ee dugsigu maamulaayo.

Cabashooyinka Ardayga

Ardayga aaminsan in darawal uu gaariga u wadaayo qaab aan amaan ahayn ama khaldan ayaa cabasho u gudbin kara maamulaha, kaasoo markaas la xariiri doona Maamulka Gaadiidka. Maamulka Gaadiidka ayaa baari doona cabashada kadibna qaadi doonta talaabo kasta oo loo arko mid muhiim ah. Natijjooyinka baaritaanka ayaa loo sheegi doonaa waalidka si hadal ah ama qoraal ah sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah.

Talaabada Anshaxa

Ku dhaqanka xeerarku waxay kor u qaadaa goob badqab iyo nidaam leh oo wax lagu baran karo. Dugsi kasta wuxuu lahaan doonaa barnaamijka cawaaqibyada wanaagsan ee ku dhaqanka xeerarka dugsiga kuwaasoo ay ku jiri karaan: aqoonsiga hadalka iyo qoraalka, faa'iidooyinka gaarka ah, warbixinnaa guriga, shaqooyinka bishii iyo abaal marinnada xuska xiliga.

Cawaaqiibaha Ardayga Iyo Waxqabadyada Lagu Saxayo Dabeecada

Ardayda aanan raacin filashooyinka dugsiga waxaa quseynayo waxqabadyo taxane ah oo loogu tallogalay in lagu saxo dabeecada. Dugsiga ardayga ayaa masuul ka ah soo saarida cawaaqibyada ka dhalan kara habdhaqanka. Buug yaraha ayaa qabanaaya ardayda:

1. Jooga dhismaha dugsiga ama gaariga dugsiga;
2. Xaadirku ku ah dugsiga ama shaqo uu dugsigu maamulaayo;
3. Ku socda baska gaynaaya ama ka keenaaya dugsiga ama shaqo dugsigu maamulaayo;
4. Ardayda anshaxoodu meelay tahayba ama xiligay tahayba carqalad toos ah ku yahay shaqooyinka, anshaxa, ama faya dhawrka guud ee dugsiga iyo ardayda/shaqaalaha dugsiga;
5. Marka adeegsanayaan isgaarsiinta dugsiga ama ilaha kumbuyutarka iyo ciwaannada ama adeegyada kale ee degmada.

Talaabada toosinta ah

Ardayga soo bandhigo dabeecada carqaladeyo waxbarida iyo waxbarashada ayaa si ku meelgaar ah looga saari karaa fasalka. Xaalado noocaas ah, macalinka wuxuu dhameystirayaa wargelinta gudbinta dhacdada/xafiiska oo ugu soo gudbi maamulaha sida ugu degdegsan ee waajibaadyada waxbarida u ogolaaneyso, laakiin xaalad walboon ka dambeyneyn dhammaadka maalinta macalinka illaa ay ka sheegaan haddii kale duruufo daran. Ogaysiiska talaabada edbinta ah waa in lagu qoraa faylka anshaxa ee ardayga.

Ogaysiiska Waalidka

Kiis kasta oo keenaaya hakin, waalidka ama masuulka iyo ardayga (haddii uu jiro 18+), ayaa loogu sheegi doonaa khadka taleefanka iyo/ama qoraal ahaan maalinta ardayga la hakiyo. Mararka qaar oo talaabo edbin ah la qaado, ardayga ayaa laga hakin karaa dugsiga sabab la xariirta baaritaan ku socda dhacdo. Haddi tallaabo edbin ah ay ku lug

Natiijooyinka Hormarsan ee Ardayga

Waxqabdarka Waxbarashada

(Horner et al., 2009)

Kartida Dareenka Bulshada

(Bradshaw, Waasdorp, & Leaf, 2012)

Natiijooyinka Bulshada iyo Waxbarashada ee SWD

(Lewis, 2017; Tobin, Horner, Vincent, & Swain-Bradway, 2012)

Hab dhaqanada Xoog sheegsiga La dhimay

(Ross & Horner, 2009; Waasdorp, Bradshaw, & Leaf, 2012)

Hoos u dhaca Heerarka Ardayga-La soo wargeliyay

Ku xadgudubka Daroogada/Alkulada

(Bastable, Kittelman, McIntosh, & Hoselton, 2015; Bradshaw et al., 2012)

Edbinta Lasoo Yareeyay ee Dugsi Ka cayrinta

Xafiiska Gudbinada Edbinta

(Bradshaw, Mitchell, & Leaf, 2010;

Bradshaw et al., 2012; Horner et al., 2009)

Dugsi ka hakinta

(Bradshaw, Mitchell, & Leaf, 2010)

Xanibaadda iyo Gooni u taaga

(Reynolds et al., 2016; Simonsen, Britton, & Young, 2010)

Natiijooyinka Hormarsan ee Macalinka

Aragtida Waxtarka Macalinka

(Kelm & McIntosh, 2012; Ross, Romer, & Horner, 2012)

Caafimaadka Ururka Dugsiga iyo Jawiga Dugsiga

(Bradshaw, Kath, Bevans, Lalongo, & Leaf, 2008;

Bradshaw, Kath, Thornton, & Leaf, 2009)

Natiijooyinka Bulshada iyo Waxbarashada ee SWD

(Lewis, 2017; Tobin, Horner, Vincent, & Swain-Bradway, 2012)

Aragtida Badqabka Dugsiga

(Horner et al., 2009)

Waa maxay Farsamooyinka Sixitaanka ah?

Ka hadal oo ka dood
baahiyaha
bulshada dugsiga.

Dhisida xariiro
caafimaad leh
oo u dhaxeeya
macalimiinta
yo ardayda.

Yaraynta, kahortaga,
yo wax ka badalka
habdhaqanka.

Xalinta waxyeelada iyo
soo celinta xariirada
wanaagsan.

Xalinta rabshada,
la xisaabtanta
shaqsyaadka iyo
kooxaha.

leedahay ka joojinta, ma jiro arday dibada looga dirayo dhismaha inta lagu jiro saacadaha dugsiga illaamaa waalidka, masuulka, ama qof kale oo masuul ah oo u qoran sida xiriirkha degdeg ah lala xiriiro mooyee. Haddii waalid aan ahayn kan masuuliyada leh, kaasoo sharchiyan awood u leh inuu arko diiwaannada ardayga, doonaayo inuu hel nuqullada xogta hakinta oo boostada gurigiisa loo dirl, waa masuuliyad saaran waalidkaas inuu dugsiga siiyo ciwaanka saxda ah.

Si loo dhiiri geliyo in ardaydeenu yeeshaan dabeeecad badqab leh oo la aqbali karo, maamulayaasha dugsiga iyo shaqaalahay aaya qaadi kara talaabo ay ku jiri karaan talo bixin, cadaalad sixitaan ah, dhex-dhexaad, maaraynta rabshada iyo/ama tixraacyada wakaaladaha bulshada. Waaladiinta waa inay la xiriiraan maamulaha markii ay walaacyo ka qabaan.

Farsamooyinka Sixitaanka ah

Soo celinta cadaalada waa barnaamij nabadeed, oo lagu xaliyo khilaafaadka kaasoo ujeedadiisa tahay in la isu keeno ardayda ay colaada dhex martay, si loo helo siyaabo lagu bogsiiyo waxyeelada la sameeyay. Barnaamiju wuxuu diirada saaraa xaaladaha rabshadaha ee ka dhaca dugsiyada ayagoo la shaqaynaaya dhammaan dhinacyada saamayntu gaartay.

Fududeeyaasha Cadaalada Dhaqan celinta ayaa jooga goobta waxayna diyaar u yihiin marka xaalado ka dhacaan dugsiga. Cadaalada Dhaqan celintu waxay xal u raadisaa sababta keentay rabshada, ayadoo haddana la hormarinaayo xirfadaha kor u qaadista xalinta rabshada iyo u dhimrinta.

Hanaanka cadaalada Dhaqan celintu waa sida soo socota:

- Gudbinta:** ardayga waxaa usoo gudbinaaya cadaalada Dhaqan celinta shaqaalahay, maamulayaasha, ama asaga qudhiiisa
- Qorista:** fududaayeesha ayaa la kulmaaya dhammaan dhinacyada si toos ah si ay ugala hadlaan wawa dhacay, saamaynta wawa dhacay, iyo waxa ardaygu u baahan yahay si looga gudbo arintaan. Kadib markay ardayda si gaar ah ula kulmaan, ardayda ayaa go'aansanaaya haddii ay doonayaan inay ka qaybgalaan shir midaysan
- Mareegta:** Dhammaan dhinacyada ayaa shir wadajir ah isugu imaad, meeshaas oo fuddudeeyaha hogamiyo wada sheekeysiga. Ardayda ayaa la waydiinayaax wawa dhacay siday u arkaan, cidda saamaynta ku leh iyo qaabka, iyo waxa u baahan in la sameeyo si waxyeelada loo saxo
- Heshiis:** Ardayda ayaa intaas kadib galaaya heshiiska sida ay u qorshaynayaan in xaaladaan looga gudbo, ayagoo sheegaaya sida ay u xalin doonaan rabshada, sida ay iskaga ilaalil karaan in rabashadu soo laabato mustaqbalka, iyo sida ay doonayaan inay uga jawaabaan xaaladaha mustaqbalka imaan kara
- Dabagalka:** Dhex-dhexaadishaayaa ayaa kusoo afjari doona mareegta Xog Aruurin Kooban, oo waydiinaaya ardayda sida ay u arkaan hanaanka dhex-dhexaadinta. Kow iyo labaatan maalin kadib shirku guud, dhex-dhexaadishaayaa ayaa dabagal ku samayn doona Xog Aruurinta Muddada Dheer, ayagoo eegaaya hormarka ardaydu ka gaareen xalka rabshadooda

Natiijooyinka La Higsanaayo

Soo celinta cadaalada ayaa wax looga qabataa qilaafka oo aasaaska rabshada ah iyadoo:

1. Waxay ku soo rogtaa la xisaabtanka oo waxay xoojineysaa kuwa gaystay waxyelada si loo saxo waxyelada ay sababtay hab dhaqankiisa/hab dhaqankeeda;
2. Waxay ku xoojisaa kuwa waxyelada geystay si ay u qeexaan waxa isaga/iyada u baahantahay si loo xaliyo waxyelada la geystay; waxay bartaa oo ay ka qeybgelisaa dhalinyarada (iyo mararka qaar qoysaskooda) farsamooyinka xalinta rabshada ee nabada ah."

Farsamooyinka Sixitaanka ah waa qaab aan isku dhafnayn, oo edbin bilaa ciqaab ah lagu sameeyo.

Farsamooyinka Sixitaanka ah waa caawimaado diirada saaraaya ardayga kuwaasoo loo sameeyay inay abuuraan xariir wanaagsan oo dhex mara dhammaan ardayda (Kline, 2016). Waxaa jira qayb kahortag ah iyo qayb ka falcelin ah oo ku jirta farsamooyinka Sixitaanka ah kuwaasoo awooda, dabcana ay tahay inay awoodaan, inay ku shaqeeyaan si dheelitiran si ay u keenaan natijada loo baahan yahay (Watchel, 2013). Qaybta "kahortaga ah" ee farsamooyinka Sixitaanka ah waxay diirada saartaa abuurista goobo waxbarasho oo sinaan iyo cadaalad leh iyo inay kobciso xariirada wanaagsan; halka qaybta "ka falcelintu" ay diirada saarto dayactirka waxyelada iyo xal u helida rabshada (Evans & Vaandering, 2016).

Baaritaannada iyo La wareegida

Baaritaannada: Baaritaannada ardayda, agabka gaarka ah ee ardayga, qaanadaha iyo gaadiidka matoorka ku shaqeeya ayaa la fulin karaa sida waafaqsan xeerarka quseeya, si loo dhawro badqabka iyo amaanka ardayda, macalimiinta, martida iyo hantida dugsiga.

Shaqaalaha Ogolaanshaha Haysta: Shaqaalaha loo ogol yahay inay sameeyaan baaritaanno waxaa ku jiri kara maamule kasta, kaaliyaha maamulaha, xubnaha Waaxda Badqabka Dadwaynaha, ama sarkaal kale oo dugsiga oo uu u xil saaray maamuluhi inuu sameeyo baaritaannada.

Baaritaannada Ardayda

Shaqaalaha dugsiga ee loo fasaxay ayaa samayn kara baarista arday, boorsada buugta, boorsada buuggaagta ama sheey kale oo ardaygu leeyahay ama alaabtiisa haddii ay shaki macquul ah ka qabaan ayna baaritaan u baahdaan. Xaaladaha gaarka ah, baaritaannada qori tuurka ah ayaa muhiim noqon kara. Shaki macquul ah oo keenaaya baaritaan waxay tixraacdaa xaaladaha keeni kara in qof macquul ah aamino in baarista qof gaar ah, meel ama sheey ay keeni karto in la helo:

1. Cadaynta jabinta xeerka maxaliga ah ama sharciga gobalka/ federaalka;

"SHAQAALAHAD LOO YAY
AYAANAA SAMEYN KAROON
HADII AY HAYSTGU
MAQODII AY HAYSTGU
SAMEEN QUUL AH EE SH
AMEYNAYO"



- 
- 2.** Cadaynta jabinta xeerka Buug yaraha iyo xeerka kale ee Gudigga Waxbarashada ama xeerarka maamulka;
 - 3.** Sheey kasta oo keeni kara khatar waxyeelo jireed ama cudur ku dhaca arday, shaqaale, marti ama hantida dugsiga, haddii uu yaalo dhismaha dugsiga, munaasabad dugsigu maamulaayo ama baska aadaaya ama ka imaanaaya dugsiga.

Marka uu jiro shaki macquul ah iyo si loo difaaco caafimaadka, badqabka, ama faya dhawrka ardayda ayadoo kormeer ay samaynayso degmada dugsiga, maamulaha ama wakiilkiisa ayaa baari kara ardayda. Labo qof oo waawayn waa inay joogaan inta lagu jiro baarista ardayga.

Haddii ardaygu diido inuu ku dhaqmo, iskuday ayaa la samayn doonaa si loola xariiro waalidka arinta ayaana loo gudbin doonaa Waaxda Badqabka Bulshada ama wakaaladaha kale ee sharci Fulinta, ayadoo loo maraayo si habboon. Waaxda Badqabka Dadwaynaha ama Wakaalada kale ee Sharci Fulinta ayaa samayn doonta baarista jirka ee ardayga sida uu qabo sharcigu.

Baaritaannada Qaanadaha

Dhammaan qaanadaha Dugsiga Degmada Lansing waa hanti ay leedahay degmadu waxaana kormeeraaya maamulaha dugsiga ama wakiilkiisa. Ma jirro waqtii degmada dugsigu ay ka tanaasulayso maamulkeeda gaarka ah ee qaanadaheeda. Ardayda waxaa mamnuuc ka ah inay ku xirtaan quful gaar ah qanaadaha dugsiga. Shaqaalaha Oggolaanshaha Haysta ayaa ka saaraaya qufulo kasta oo gaar ah oo lagu xирto qanaadaha.

Qufulada dugsiga ayaa la siiyaa ardayda si ay ugu qancaan ayna si ku meel gaar ah u adeegsadaan. Ardaydu waa inay u adeegsadaan qaanadaha keliya inay gashtaan agabka la xariira dugsiga iyo alaabaha la ogol yahay sida jaakadaha, sigisaanta, agabka labiska iyo qadada. Ardayda ayaa si gaar ah masuul uga ah agabka ku jira qaanadhooda lamana wadaagi karaan qaanadooda ama biinka qaanadooda ardayda kale.

Baaritaannada isdhaafka ah ee qaanadaha dugsiga ayaa la samayn doonaa. Shaqaalaha Oggolaanshaha Haysta ayaa baari kara qaanadaha iyo waxyabaha ku jira qaanadaha markay doonaan, ayagoon u sheegin ardayga aana fasax ka qaadan waalidka/Masuulka ardayga. Eeyga wax baara iyo qalab aqoonsi leh ayaa loo adeegsan karaa in lagu sameeyo baaritaan goos-goos ah qaanadaha. Labo (2) qof oo waawayn waa inay joogaan inta lagu jiro baarista qaanada.

Haddii sarkaalka sharci fulnta ee samaynaaya baarista qaanada arday uu haysto amarka baarista ee baaritaankaas, maamulaha ama wakiilkiisa ayaa si degdeg ah u gaynaaya sarkaalkaas qaanada loo xilsaaray ardayga una fasaxaaya inuu baaro qaanada. Markasta oo ay suurtagal tahay, baarista noocaas ah waa in la sameeyaa asagoo uu joogo maamulaha ama wakiilkiisa. Sarkaalka sharci fulnta ayaa baari kara qaanada asagoon amarka baarista haysan haddii uu ogolaado baarista qofka qaanada isticmaalaaya.

Haddii sarkaalka sharci fulinta, oon ahayn sarkaal ka socda Waaxda Badqabka Bulshada ee Dugsiga Degmada Lansing, uu doonaayo inuu baaro qaanad la siiyay arday asagoon fasax haysan, maamulaha ama wakiilkiisa ayaa waydiin doona nooca xogta ku qasabtay sarkaalka inuu aamino in caddaynta danbi lumi doonto, la burburin doono ama la fogayn doono haddii baarista iyo la wareegista aan degdeg loo samayn, kahor intaan fasaxa la siin. Haddii aamulaha dugsiga ama wakiilkiisu uusan ku qancin dalabka sarkaalka, wuxuu u fasaxayaa sarkaalka inuu ku baaro awoodiisa sharci laakiin kama qaybgeli doono baarista. Maamulaha ama wakiilkiisa waa inuu dhacdada u sheegaa isla markaba Agaasimaha Waaxda Badqabka Dadwaynaha, kaasoo u sheegi doona cida ka saraysa sarkaalka dhacdada.

Qalal

Waxyabaha la aamino inay la xariiraan fal sharci daro ah ama jabinta xeerka Buug yaraha, xeerka Gudigga, sharciga maamulka, ama kaasoo keenaaya waxyeelo jireed ama xanuun ku dhaca arday, shaqaale, marti, ama hanida dugsiga waxaa la wareegi kara qofka samaynaaya baaritaanka. Alaab kasta oo lala wareego baarista awgeed waxaa lagu wareejin doonaa Waaxda Badqabka Bulshada ama wakaalada kale ee sharci Fulinta. Alaabaha lala wareego ayaa laga yaabaa inaan lasoo celin.

Baarista Gaariyaasha

Shaqaalahi Oggolaanshaha Haysta ayaa baari kara gaariyaal kasta oo la keeno dhismaha dugsiga uuna wato arday markay doonaan haddii ay si macquul ah uga shakiyaan inay gaariga ku jiraan:

- 1.** Cadaynta jabinta xeerka maxaliga ah ama sharciga gobalka/ federaalka;
- 2.** Cadaynta jabinta Xeerka iyo xeerka kale ee Gudigga Waxbarashada ama xeerarka maamulka;
- 3.** Sheey kasta oo keeni kara khatar waxyeelo jireed ama cudur ku dhaca arday, shaqaale, marti ama hantida dugsiga, haddii uu yaalo dhismaha dugsiga, munaasabad dugsigu maamulaayo ama baska aadaaya ama ka imaanaaya dugsiga.

Baarista noocas ah waxaa lagu samayn doonaa ardayga loo sheegin. Ardayda diida inay la shaqeeyaan baaritaanka gaariga ayaa si degdeg ah u lumin doona masaalixda gaari wadista iyo baakinka waxaana la marsiin doonaa talaabo edbin ah oo dheeraad ah sida ku cad Buug yaraha.

Si loo difaaco caafimaadka, badqabka ama faya dhawrka ardayda iyo bulshada dugsiga, sharci Fulinta ayaa lala xariiri doonaa si ay gacan uga gaystaan gaariga uu dugsiga la yimid qof aan ahayn arday. Eeyga wax baara iyo qalab aqoonsi leh ayaa loo adeegsan karaa abuurista shaki macquul ah iyo in lagu sameeyo baaris.



Gacan qabashada ama Gardaduubka ay sameeyaan Shaqaaluhu

Isticmaalka Xaalada degdega Isgooniyeenta iyo Xakameynta

Xakamaynta Degdega ah lama adeegsan karo in ka badan inta muhiimka u ah in ardaygu xakameeyo caradiisa.

- Lama hayn karo wax ka badan 15 daqiqo ardayda dugsiga hoose;
- Lama hayn karo wax ka badan 20 daqiqo ardayda dugsiga dhexe/sare;
- Haddii ay ka badato 15/20 daqiqo:
 - Taageero dheeraad ah ayaa loo baahan kara (tusaale, shaqaale kale, kalkaaliso, ama shaqaale kale oo muhiim ah.)



Dugsiga degmada deegaanka ayaa loo ogolyahay inay sameeyaan, qaataan, oo hirgeliyaan xeerkooda deegaanka gaarka ah ee waafaqsan xeerka gobolka ama u isticmaalaan xeerka gobolka isticmaalka xaalada degdega ee gooni u taaga iyo xanibaada. Si kastaba, Dugsiga Degmada Lansing wuxuu raacaa hagida guud ee Isticmaalka Degdega ah ee Gooni u taaga iyo Xanibaada iyo Xakameynta Jireed ee Waaxda Waxbarashada Michigan (MDE) sida ay ansixieeneGuddiga Waxbarashada Gobolka ee Maars 14, 2017 oo la cusbooneysiiy Luuliyo 2017.

Dugsiga Degmada Lansing uma ogola shaqaalaha inay adeegsadaan cizaab jireed (adeegsiga ama ku hanjabida cizaab jireed si loo badalo handhaqan) ka dhan ah arday. Xanibaada Jirka ee Degdega ah ayaa la xariirta in ardayga jirka la qabto taasoo ka hortagaysa ama si wayn u xakamaynaysa dhaqdhaqaqa ardayga. Xanibaada Jirka ee Degdega ah waa xalka ugu danbeeyay ee farogelinta badqabka xaalada degdega ah

Shaqaalaha ayaa loo ogol yahay inay adeegsadan xanibida jireed (halkii ay ka adeegsan lahaayeen "xoog") ka dhan ah arday si:

1. Uga difaacaan naftooda ama qof kale weerar gacan qaad ah
2. Uga difaacan ardayga inuu naftiisa waxyelo u gaysto
3. Si ay u joojiyaan carqalad keeni karta dhaawac jireed oo ku dhacda qof
4. Inay kala wareegaan ardayda hub ama sheey kale oo khatar ah
5. Illaalinta dhismaha: Haddii xeerka baabi'inta dhismaha uu ku sababo halis dhow badqabka ardayga ama xubinta shaqaalaha, isticmaalka degdega ee gooni u taaga iyo xakameynta jireed waa la ogolyahay
6. Inay jir ahaan u xakeeyaan arday samaynaaya fal carqaladayn ah oo ka dhan ah xarunta waxbarashada kaasoo ku fashilmay inuu raaco amarada afka looga sheegaayo si uu u joojiyo dhaqankaas. Ka xaynta jirka la qabto waa taabashada ama qabashada ardayga ayadoo la adeegsanaayo taabashada ugu yar si loogu riixo inuu meel ka dhaqaqo oo tago meel kale
7. Dugsiga degmada ayaa xaq u leh inay kala hadasho ardayda inay baaraan arinta ama rimaha ka soo baxayo dugsiga, ee baska, iyo howlaha la xiriilo dugsiga.

Faragelinu waa inay noqotaa mid badqab leh, habboon, macquul ah oo ku eg darnaanta habdhaqanka, da'da iyo heerka hormarka ardayga, xajmiga jireed, jinsiga, caafimaadka jireed iyo xaaladaha dhimirka, iyo taariikhda shaqsiga ah (xad gudubka jireed ama galmo ama uurkutaalada).

Habdhaqannada Keeni kara Talaabo Edbin ah

Kuwaan soo socda waa tusaalayaasha falalka xun ee ardaydu ku mutaysan karaan edbin. Talaabada gaarka ah ee edbinta ayaa lagu jaan goyn doonaa darnaanta falka xun iyo xaaladaha ku xeeran.

Heerka 1 – Dambiyada Yaryar

Hab dhaqamada leh saameyn xun ee ku saabsan deegaanka dugsiga.

Heerka 2 – Dambiyada Dhexaadka/Ku celinta

Waa habdhaqannada abuuraay qaska sida wayna carqalada ugu ah goobta dugsiga, laakiin aan khatar ku ahayn ardayda, dadka kale ama hantida, AMA aan keenayn dhaawac wayn.

Heerka 3 – Dambiyada Weyn

Habdhaqannada khatarta ku ah caafimaadka iyo badqabka ardayga, ardayda kale, shaqaalah, ama hantida. Dabeecada u adkeysaneysay faragelinta kale.

Luuqada Cayda ah (Heerka 1-4) Waa fariin hadal ah oo adeegsata erayada si khaldan ayna ku jiri karana, laakiin aan ku koobnayn magacyada xun oo dadka loogu yeero, iyo waxyaabaha galma ah.

Alkulada (heerka 2-6) Haysashada iyo isticmaalka alkulada iyo/ama walxaha aan alkulada aheyn waa ka mamnuuc. Khamrada, oo sidoo kale loogu yeero magaceeda kiimikada ee ethanol, waa daroogo miyirka badasha taasoo ku jirta maadooyinka cabitaannada sida khamrada, qalaca, iyo biirka (calqaad). Waxaa loo aqoonsan yahay maado raaxo, taasoo keenta sifooinka lagu yaqaano marqaanka khamrada ("cabsanaan").

Gubida (heerka 6) Waa gubista kasta ah ama isku dayay gubida, dhisme walba ama dhismaha ay leedahay, kiraysatay, ama daynsatay degmada dugsiga ama hantida qofta.

Weerar (jireed) (Heerka 3-6) Qof doonaaya inuu sababo ama isku dayaaya inuu sababo waxyeelo jireed oo ku dhaca qof kale asagoo adeegsanaaya rabshad (tusaale, shaqaale ama ardayda).

Hanjabaada Bamka (heerka 3-6) Samaynta hanjabaada bamka ama hanjabaad lamid ah oo lagu sameeyo dhismaha dugsiga, hantida kale ee dugsiga, ama munaasabada la xariirta dugsiga.

Xoog sheegashada (Heerka 1-6) Waxaa lagu qeexaa falal kasta oo soo noqnoqda oo qoraal ah, hadal ah, ama jirka ah, ayna ku jiraan xoog u sheegashada baraha interneedka [tusaale, xariir kasta oo oonleen ah, ayna ku jiraan, laalkiin ku koobnayn falalka oonleenka lagu diro, sida interneedka, taleefanka ama moobilka, caawiyaha casiriga ah ee qofka (PDA), ama aalada wayarleska ee gacanta lagu qabto] kaasoo, ayadoon laga eegayn mawduuceeda ama ujeedada laga lahaa, loogu talagalay ama uu qof macquul ah u arki karo inay waxyeeeo ku tahay hal (1) arsay ama ka badan si toos ama ana si dadban ayadoo la samaynaayo waxyaabaha soo socda:

1. Si wayn carqalad ugu ah fursadaha, faa'iidooyinka, ama barnaamijyada waxbarashada ee hal (1) arday ama ka badan;
2. Si xun u saamaynaya awooda ardayga ee ka qaybgalka ama ka faa'iidaysiga barnaamijyada waxbarashada degmada dugsiga ama shaqooyinka ayagoo ardayga gelinaaya cabsi macquul ah oo la xariirta waxyeelada jirka ama abuuraysa walaac dareen oo muuqda;
3. Inay waxyeelo muuqata oo wayn ku yeeshaan caafimaadka jirka iyo dhimirka ardayga; iyo/ama
4. Inay sababaan carqalad wayn oo ku dhacda, ama fawdo wayn, nidaamka shaqada dugsiga.

Xoog u sheegashada ayaa noqon karta mid jireed, hadal, dhimir, ama isku darka saddexdoodaba. Tusaalayaasha qaar ee xoog u sheegashada ayaa ah:

1. Jirka: wax ku dhufasho, laadis, calyo ku tufid, riixid, hantaaruro; qaadashada iyo/ama waxyeelaynta alaabaha qofka, ka xoogida lacagta, jidgoynta ama xirida dhaqaqa ardayga, taabsho jireed oon ardaygu ogolaan.

2. Hadal: caynta, ku shactiraysiga, aflagaadada, magac ugu yeerida, u hanjabida.
3. Dhimirka: xan ka faafinta, kaga faa'iidaysiga xariirada bulshada, cadaadinta, ama samaynta takoor bulsho/dhaleecayn, xoogid, ama caga juglavn. Arintaan ayaa ku imaan karta dhawr qaab oo kaladuwan, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn, qoraallada, iimeelada, boostiyada baraha bulshada, iyo saqirada.
4. Xoog u sheegashada oonleenka: xariir kasta oo oonleen ah, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn falalka oonleenka lagu diro, sida interneedka, taleefanka ama moobilka, kaaliyaha casriga ah ee shaqsiga ah (PDA), ama aaladaha wayarleska ee laqaato.
5. Dhibaataynta Isirka/Qoomiyada ama Caga juglaynta: Falka xun ee ujeedada leh ee dhibaataynta ama u caga juglaynta qof sabab la xariirta midabkiisa, asalkiisa ama isirkiisa.
6. Dhibaatayn galmo ama Caga juglayn*: Falalka aan la mahadin ee galmada, shactiraysiga, ku kaftamida, hadalada, ama su'aalaha, hadal ahaan ama jir ahaan, oo ku aadan qof kale sabab la xariirta jinsigiisa ama dookhiisa galmada. Waxaa sidoo kale ku jira codsiga asxaannada galmada ama falka hadalka ama jirka ee galmada la xariira marka falka noocas ah uu leeyahay ujeedo ama saamayn carqalad xun ku ah shaqada waxbarashada ardayga asagoo abuuraaya cagajuglayn, colaad ama goob waxbarasho oo fawdo ah.

Dugsiga Degmada Lansing waxay mamnuucaysaa dhibaatayn galmo ee sharci darada ah. Manuucidaan ayaa qabanaysa anshax xumada galmada ee ardaydu kula kacaan ardayda kale, shaqaalaha degmada, xubnaha gudiga ama adeeg bixiyaasha dugsiga, oo lagu sameeyo dugsiga ama goob munaasabad ama shaqo dugsigu ka socoto.

Arday kasta oo aaminsan in isaga/iyada loo gaystay dhibaataynta galmada mamnuuca ah waa inuu degdeg ugu sheegaa maamulaha, macalinka ama mid ka mid ah Saraakiisha **U hogaansanaanta Degmada (arag Bogga 5 aad)**. Waalidiinta ayaa sidoo kale soo sheegi kara walaacyadaan.

Ardayda ama shaqaalaha lagu ogado inay sameeyeen falalka anshax xumada galmada oo ay ku jiraan falalka galmada aan la aqbalin ama qasabka ah ama fal galmo la xariira ayaa edbin degdeg ah lagu samayn doonaa. Edbinta waxaa ku jiri kara, haddii

xaaladaha jira saamaxaan, hakinta ama cayrinta arday iyo hakinta shaqada ama cayrinta shaqaalaha.

Khiyaanada/Marin habaabinta (heerka 1-4) Inaad keento shaqo been abuur ah ood ka dhigayso mid aad adigu samaysay ama siinta ardayda kale jawaabaha imtaxaanka ama nuqluka shaqada. Tayada shaqada lagama eegi doono marka la qaadaayo go'aaminta talaabada edbinta ah.

Habdhaqanka Fawdada ah (heerka 1-6) Fal kasta oo ka dhaca gudaha ama aaga dugsiga, ayna ku jiraan fasalka, kaasoo khatar ah ama carqalad ah halisna gelinaaya badqabka ardayda, shaqaalaha iyo dadka kale, ayna ku jiraan kan qofkaas fawdada abuuraaya. Tan waxaa ku jira laakiin kuma koobna: tuurista kubadaha barafka, dhagaxaanta, ama agabka kale; xanibida kaamirooyinka amaanka; riixida; xiirida; qaylinta; ama ku ordida hoolka; iyo abuurista, daawashada ama kicinta falalka xun ee ardayda lagu imtaxaani doono. Inaad isha ka daawato fal qof xoog loogu sheeganaayo ama dagaal ayaa loo arki karaa fal fawdo ah.

Si xun u isticmaalka Aaladaha Isgaarsiinta Elektarooniga (ECDs) (heerka 1-3) Aalad elektaroonig oo leh awooda loogu gudbinayo farimaha dhinaca isticmaalka intarneetka, xirmada intarneetla, ama baraha kale ee laga helo Wi-Fi. Inaad haysato ECD yada waa lagu ogol yahay tilmaamaha ku qoran boggaga 18 illaa 19 ee Buug yaraha.

Dhibaataynta Isirka/Qoomiyada ama Caga juglaynta (heerka 1-5) Falka xun ee ujeedada leh ee dhibaataynta ama u caga juglaynta qof sabab la xariirta midabkiisa, asalkiisa ama isirkiisa.

Aaladaha Walxaha qarxo/Huro (heerka 1-6) libinta, haysashada, ama isticmaalka aaladaha walxaha qarxa ama hora oo ay ku jiraan bambooyinka iyo walxaha holaca.

Boob/Dhaca (heerka 2-6) Ka qaadashada lacag ama hanti (wax qiimo leh) qof si xoog ah adoo adeegsanaaya awood jireed ama mid cagajuglayn ah.

Alaarmiyo Been ah/Wacitaanada 911 (heerka 2-5) Si been ah u daarayo nidaamka alaarmiga dambka iyo/ama garaacida eerka 2-5) Si been abuur ah ugu hawlgelinta nidaamka alaarmiga dabka iyo/ama garaacida xaasidnimada ah ee Xarunta Gurmadka 911 ee dhismo walboo dugsiga ah aam dhismaha dugsiga.

*Dugsiga Degmada Lansing ayaa ciqaab adag ka bixisa sheegashada been abuurka ah. Ka eeg bogga 30 aad ee cawaaqibyada ka dhasha sheegashooyinka been abuurka ah ee weerarka ama dhibaataynta galmada.

Sheegashooyinka Beenta ah ee Dhibaataynta ama Weerarka Galmada Ardayda sida kaska ah u sameeya warbixinta beenta ah, ayagoo soo gudbinaaya Cabashada Rasmiga ah ee been abuurka ah, ama hadal been ah sheegaaya ama soo diraaya xog been ah inta lagu jiro hanaanka cabashada Ttile IX ayaa loo arkaya fal jabinaaya Xeerka Buug yaraha Ardayda. Fal danbiyeedyada noocas ah, ardayda ayaa lagula xisaabtami karaa si waafaqsan Cabirkha Anshaxa/Faragelinta.

Dagaalka (heerka 2-6) Taabashada jireed ee gacan qaadka la ishaafsado. Fadlan ogow cawaaciibaha dagaalka ardayga ee fasalada K-6 waa sida xigta: danbiga 1aad hal (1) ilaa sagaal (9) maalmood oo dugsiga laga cayrsho; danbiga 2aad ayaa keeni kara in ardayga la geeyo xafiiska Dhaqanka Dugsiga ayadoo la raicinaayo Dukumiintiyada 7 Arrimood, dagaallada intaas kadib - waxaa la gaynayaa Xafiiska dhaqanka ayadoo laga yaabo in dugsiga gabi ahaanba laga saaro.

Fadlan ogoow in cawaaciibaha ka dhasha dagaalka ardayda fasallada 7-12 ay yihiin sida soo socota: **Dagaalka 1aad iyo 2aad** Ka joojinta 3-9 maalin; **Dagaalada ku xiggo** ka joojinta Xafiiska Dhaqanka Dugsiga ee leh suurtoglnimada ka ceyrinta.

Saxiixa beenta ah (heerka 1-5) Adeegsiga ama qorista magaca ama aqoonsiga qof kale si loogu helo, ama been looga sheego waqtiyada, taariikhaha, buundooyinka, ciwaannada, ama xogta kale, ayna ku jiraan foomamka dugsiga.

Khamaarka (heerka 1-5) Khamaarka ayaa ah mid sharci daro ah wuxuuna keenayaa in dugsiga lagaa cayrsho. Khamaarku waa aqbalida lacag ama wax kale oo muhiim ah oo aad ku helayo fal aan la hubin.

Fal burcadeddka (heerka 1-6) Soo bandhigida astaamaha burcada ama muujinta dabeecadaha ama ishaarooyinka astaanta u ah xubnaha burcada; abuurista, u ololaynta ama kobcinta falalka halista ku ah badqabka ama faya dhawrkadadka kale ama ka qaybgalka falalka loogu talagalay in dadka kale lagu cabsi gasho; ka qaybgalka falalka loogu talagalay inay kiciyan fawdo.

Khatar gelinta (heerka 1-5) Ku sabida dadka kale khiyaano ama xadgudub kaasoo abuuraaya khatar jireed, maskaxeed ama dareen kaasoo ay qasab tahay in qofku u dulqaato si uu xubin uga noqdo koox, urur, ama dabaqad. Doonista qofka doonaaya inuu kooxda galo lagama eegi doono marka la go'aaminaayo talaabada anshaxa.

Amar diidada (heerka 1-5) ku fashilmida adeecida, ku dhaqanka, ama fulinta amarka macquulka ah ee kasoo baxa shaqaalahu dugsiga (maamulaa, macalinka, xoghayaha, masuulka, shaqaalahu maqaayada, shaqaalahu amaanka, kaaliyaha ama darawalka baska).

Caga juglaynta/Dabagalka/Hanjabaadaha (Heerka 1-6) Gelinta qof kale cabsi muuqata oo la xariirta waxyeelo jireed adoo adeegsanaaya erayo hanjabaad ah ama fal kale, laakiin aan lasoo baxayn hub ama qofka gelinayn weerar jireed. Sidoo kale waxaa ku jira habdhaqan kasta (qoraal, hadal ama jireed) kaasoo leh leeyahay ujeedo ama saamayn carqalad xun ku ah shaqada waxbarashada ardayga ama abuuraaya cagajuglany, colaad ama goob waxbarasho oo fawdo ah.

Buruburin Kas ah (heerka 1-6) Burburinta kaska ah ama duminta hanti ay leedahay, ama kiraysatay, ama dayn ku ah nidaamka dugsiga ama hantida (ayna ku jiraan gaariyaasha) dadka u shaqeeya dugsiga ama jooga markas dugsiga.

Marijuana iyo Waxyabaha Kale ee Maanka Dooriya (heerka 2-6) libinta, Haysashada, ama Qaybinta doroogooyinka sharciga ah ama sharci darada ah, iyo adeegyada doroogada ayaa mammuuc ah. Xeerkaan waxaa ku jira, laakiin aan ku koobneyn, daawooyinka la xakameeyo ee lagu daray cuntada/cabitaanka (kuwa la ruugo, iyo kuwa u eg doroogada). (Waxaan ku jirin daawooyinka la qaato si waafaqsan Xeerka Maamulka ee tirsigisu yahay. 5141.3). Cawaaciibaha haysashada/isticmaalka doroogooyinka sharciga ama sharci darada ah iyo/ama qalabyada doroogada waa sida xigta: **danbiga 1aad** 3-9 maalmood dugsiga lagaa cayrsho adoo laguu diraayo wakaalada doroogada oo baxsan dugsiga; **danbiga 2aad** wuxuu keeni karaa in lagu geeyo Xafiiska Dhaqanka Dugsiga adoo lagu raicinaayo dukumiintiyada 7 sababood iyo in laguu diro wakaalada baxnaaninta isticmaalka maandooriyaha.

Ciyaal suuqnimada iyo faduulinta galmo (heerka 1-5) Falka adeegsiga ciyal suuqnimada ama luuqada galmoda la xariirta ee hadalka ama qoraalka ah, haysashada sawirada dadka qaawan, samaynta iljabinta anshax xumada ah ama falalka ama samaynta fal galmo quseeya adoo jooga dhismaha dugsiga, baska dugsiga ama munaasabad ama hawl dugsigu qabanaayo.

Haysashada ama adeegsiga Qori boonbale ah/Wax u eg ama Hub Macmal ah/Qaabka hubka leh (heerka 1-6) Haysashada ama adeegsiga wax u eg hubka/qori boonbale ah, ama wax leh astaamaha hubka. Tusaalooyinka waxaa ku jirayo laakin kuma xadidna: boombalaha

qoryaha, aaladaha filimaanta ama bandhiga, bistoolada orad bilowga, noocyada, loo koobiyeeyo sida ama aalad walbo kale ee loo naqshadeeyay ama loo isticmaalo loo ekeysiyo qori. Kuwaan waxay u egyihiin qoryo/qoryaha moobalaha MA awoodaan inay tuuraan xabad.

Haysashada ama Adeegsiga Qorisga Airsoft (Heerka 1-6) Haysashada ama adeegsiga Qoriga Airsoft ama hub kale/qori kale kaaso ay ka dhacaan faniino sida miraha caaga ah oo ku shaqeeya gaaska, cadaadiska aariyada, ama dheeemiska ah. Qoryaha aariyada/qoryahaa balooniga (BB) waxaa loo tixgeliya hub oo LAGUMA darin qeexidaan.

Weerarka Galmada (Heerka 1-6)* Dugsiga Degmada Lansing waxay si degdeg ah u baaraysaa warbixinta waxayna go'aaminaysaa heerka uu gaaray xadgudubka ka dhanka ah Buug yaraha Ardayda eedegmada. Dugsiga Degmada Lansing waxay mamnuucaysaa taabashada galmada ee u dhexaysa ardayda jooga dugsiga, ama saaran baska dugsiga, ama jooga munaasabada dugsigu qabanaayo. Degmadu uma dulqaadan doonto falalka ka dhanka ah ardayda ee keenaaya weerarka galmada ama falka galmada noocuu rababa ha noqdee.

Weerarka Galmada waxaa sharchiyan/danbi ahaan lagu qeexaa Fal Danbiyeedka Galmada oo leh heerarka koow illaa afraad, kaasoo ay ku jiraan fal kasta oo galmo oo loo gaysto qof kale, si xoog ah iyo/ama si kasoo horjeeda doonista qofka, ama fal kasta oo galmo oon la qasbi karin kana dhan ah doonista qofka ayadoo dhibanuhu uusan awoodin inuu ogolaado iyo ayadoo awood ama xoog loo adeegsaday ama loo hanjabay. Adeegsiga awooda sharci ayaa sidoo kale ah nooc qasbid ah.

Qof jira 15 ama ka yar ma bixin karo oggolaansho sharci falalka galmada. Dugsiga Degmada Lansing wuxuu mamnuucaya falalka galmada iyada oo aan laga eegin da'da. Haddii fal noocas ah ka dhaco baska dugsiga, ama munaasabada dugsigu maamulaayo, ardaygu waa inuu falka usoo sheegaa labadaba shaqaalaha Dugsiga Degmada Lansing (tusaale, maamulaa, macalinka, badqabka bulshada, ama Saraakiisha U hogaansanaanta Degmada) iyo laanta sharci Fulinta. **Title IX baaritaanka waxaa sameynaya xiriiriyaha degmada ee Title IX iyo badqabka dadwerynaha ayaa soo wargelinayo dhammaan falalka galmada la xiriir ee fullinta sharciga oo dib u eegid dheeraad ahg.**

Tallaabooyinka xeerka/ku meelgaarka ag ee Title IX ayaa quseyn karo tusaalooyinka ka dhaco meel ka baxsan dugsiga, iyo/ama ka hor ama kadib dugsiga.

Dhammaan falka ama ficalka galmada ee dhixmara shaqaalaha Degmada iyo ardaya

ayaa jabinaaya xeerka Gudigga, waana mamnuuc waana qasab inuu soo sheego shaqaalaha Degmada, marka la ogaado. Ardayda waxaa lagu boorinayaa inay isla markaba usoo sheegaan dhammaan falka noocas ah **Saraakiisha U hogaansanaanta Degmada (arag bogga 5)**, maamulahaaga ama qof kale oo wayn ood ku kalsoon tahay.

Dhibaataynta galma (heerka 1-6)* Falalka aan la mahadin ee galma, shactiraysiga, ku kaftamida, hadalada, ama su'aalaha, hadal ahaan, qoraal ama adeegsiga ishaaraooyinka iljabinta gamada wata oo ku aadan qof kale sabab la xariirta jinsigiisa ama dookhiisa galma. Waxaa sidoo kale arrintaan ku jira codsiga asxaannada galma ama falka hadalka ama jirka ee galma la xariira marka falka noocas ah uu leeyahay ujeedo ama saamayn carqalad xun ku ah shaqada waxbarashada ardayga asagoo abuuraya cagajuglayn, colaad ama goob waxbarasho oo fawdo ah. (Caga juglaynta galma ayaa ku jirta "Caga juglaynta/Dabagalida/Hanjabaadaha")

Falka ayaa loo aqoonsadaa mid aan qofku soo dhawayn haddii ardaygu uusan codsan ama ku casuumin qofka waxaana loo arkaya falka mid xadgudub ah ama gardaro ah. Da'da ardayga, nooca falka, iyo arrimaha ku xeeran ayaa saamaynaaya in ardaygu awoodo inuu soo dhaweyyo falka galma iyo inkale.

Aqbalaada ardayga ee falka ama inuu ka caban waayo waxa ku dhacay kama dhigna in markasta uu falka aqbalay.

Tusaale 1: Arday ayaa kaftan galmo oo cay ah ku yiri arday kale, laakiin ardayga ayaan wax falcelin ah ka bixin kaftanka ama diidin. In ardaygu diidi waayay cayda kama dhigna in uu aqbalay hadalka lagu yiri.

Tusaale 2: Ardayga #1 ayaa shumis dhab si kas ay ugu siiyay ardayga #2 halmar asagoo dugsiga jooga. Maalintii labaad ee dugsiga, ayagoo saaran baska dugsiga, ayuu ardayga #1 markale, shumiay, ardayga #2 kadibna iljabin galmo ku sameeyay ardayga #1. Ardayga #1 ayaa dhoola cadeeyay, laakiin kama jawaabin mana soo sheegin falka. In ardayga #1 uusan ka jawabain ama soo sheegin, kama dhigna inuu soo dhaweyyay habdhaqanka.

Dugsiga Degmada Lansing waxay mamnuucaysaa taabashada galmada ee u dhexaysa ardayda jooga dugsiga, ama saaran baska dugsiga, ama jooga munaasabada dugsigu qabanaayo. Degmadu uma dulqaadan doonto falalka ka dhanka ah ardayda ee keenaaya weerarka galmada ama falka galmada noocuu rababa ha noqdee.

*Dugsiga Degmada Lansing ayaa ciqaab adag ka bixisa sheegashada been abuurka ah. Ka eeg bogga 30 aad ee cawaaqibyada ka dhasha sheegashooyinka been abuurka ah ee weerarka ama dhibaataynta galma.

Tallaabooyinka xeerka/ku meelgaarka ag ee Title IX ayaa quseyn karo tusaalooyinka ka dhaco meel ka baxsan dugsiga, iyo/ama ka hor ama kadib dugsiga.

Fariimaha galmaada iyo Sawirada Qaawan ee Carruurta (heerka 1-6) Falka wadaagista ama soo bandhigida sawirada galmaada ama qaawan ama sawirada shaqsiga iyo/ama ardayda kale, oo lasoo dhigo baraha bulshada ama miid kale. Qof kasta oo si ogaal ah u sameeyaa, u qaybiya, ama u haysta sawirada carruurta qaawan wuxuu jabinayaa Xeerka Ciqaabta Michigan (750.145c). Sawirada qaawan ee carruurta oo muujinaaya muuqaal, sawir, filin, jaantus, fiidyoow, sawir aaladaha elektarooniga ah, kumbuyuutar ama sawir ama cod lagu duubay kumbuyuutar kaasoo ilmo (ka yar 18) ama u muuqda inuu ku jiro ilmo samaynaaya fal galmo ah. Sawirka waxaa sidoo kale ku jiri kara filin aan lasoo shaac bixin ama wax xun.

Xeerka Title IX ama xeerarka ku meel gaarka ah ayaa qaban kara dhacdooyinka ka dhaca banaanka dugsiga, iyo/ama kahor ama kadib dugsiga dhaca.

Xatooyada/Haysashada Hanti Lasoo xaday (heer 1-6) Qaadashada sharci darada ah, xadista ama haysashada lacag ama hanti la xaday.

Maadooyinka tubaakada iyo Shiishada (heerka 2-3) Haysashada Tubaakada ama Agabka Shiishadu waa xaaraan. "Xeerkaan waxaa ku jira, laakiin aan ku koobnney, dhammaan maadooyinka tubaakada ee sigaarka korontada, shiishada, xashiiska, qalimaanta sigaarka, aaladaha kale ee elektarooniga lagu dhuuqo nikootiinta, iwm.

Joogista/gelista/Ku wareegida Sharci Darada ah (heerka 1-5) Inaad ku jирто ама аг юогто ааг каста оо дугсига марка ardaygu uusan sabab sharci ah halkaas u joogin; falka ku kulmida ama ku wareegida dhismaha dugsiga ama hantida dugsiga adoon fasax ka haysan shaqaalah. Tan waxaa sidoo kale ku jira joojista sharci darada ah ee dhismaha dugsiga ama goobta dugsiga inta lagu jiro saacadaha casharada marka ardaygu uu u safro ama ka yimaado dhismaha ama shaqada Dugsiga Degmada Lansing. Arday kasta oo laga hakiyay ama laga cayrshay dugsiga waxaa mamnuuc ah inuu yimaado dhismaha Dugsiga Degmada Lansing.

Jabinta Sharciyada Magaalada, Gobalka ama Federaalka, ama Sharciyada Danbiga (heerka 2-6) Samaynta ама ка qaybgalka falal kasta oo ау mamnuucayaan sharciyada federaalka ама gobalka ама xeerka maxaliga ах marka falalka noocaas ах ау saamaynayaan badqabka iyo shaqada nidaamsan ee dugsiga, ayadoon laga eegayn meesha fal danbiyeedyadu ka dhacayaan.

Hubka (Heerka 2-6) libinta, Haysashada, ама Adeegsiga, qaadista, adeegsiga, isticmaalka, kaydinta ама ku hanjabida hubka ама waxyabaha kale ee khatarta ах ee ka jira dugsiga ама xarumaha dugsiga аяа keenaaya in ardayga dugsiga laga cayrsho. Hubka аяа lagu aqoonsadaa sadex (3) qaybood: (1) hubka khatarta ах ee u baahan in ardayga la cayrsho: (qoryaha, seefta, mindida, stiletto, mindi afaysan oo ka dheer saddex (3) inji, mindi lagu furo aalad farsamo, soofe, jijinta wax lagu feero); (2) hubka kale ee caadiyan la adeegsano ама loo sameeyay in lagu abuuro waxyeelo jireed ама cagajuglany аyna ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn: qoryaha aariyada (qoyaha aariyada аяа h=noqon kara gaas, waxayna ka duwan yihii qoryaha caaiga ah), qoryaha bb, blackjack, billy clubs, bludgeons, tazers, aaladaha gaaska buufiya, mindi afysan oo leh saddex (3) inji ама ka gaaban, banbo gacmeed, silsiladaha, hubka farshaxanka; (3) faracyada kale ee loo sameeyay ujeedooyinka kale kuwaasoo loo adeegsado in lagu abuuro dhaawac jireed ама caga juglany, аyna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn: suumanka, bokis jarayaasha, shanlada, qalin qoriga, faylalka, sakiinta iyo jiho sheegayaasha.

Dugsi ka hakinta

Ka saarida ardayga dugsiga sababo anshax awgood muddo **ka yar 60 maalmood oo kuwa dugsiga la dhigto ah.**

Rabshadaha aan darneyn ee Buug-yaraha Ardayga аяа sababi karo ka joojinta dugsiga. Maamulayaasha dugsiga аяа arday ka saari kara dugsiga illaa 9 maalmood kadib markuu jabiyo xeerka. Dugsi ka saarida waxaa lagu qori doonaa diiwaannada ardayga, waxaan lagu dabiqi doonaa talaabada anshaxa mustaqbalka oo lagu salaynaayo inta jeer ee uu sidaas u dhaqmay. Dugsi ka cayrin kasta oo lagsoo jeediyo oo 10 maalmood ама ka badan ау аяа u baahan kara in loo gudbiyo Xafiiska Dhaqanka Dugsiga ayadoo la raacinaayo dukumiintiga taageeraaya tixgelinta 7 Arimood ee Sharciga Gobalka.

Arday la cayrshay kumasoo laaban karo dugsiga, kama qaybgeli karo nashaadaadka dugsiga ама kama qaybgeli karo wax kamid ах nashaadaadka ka baxsan manhajka inta muddada cayrinta lagu jiro, ayadoon fasax laga haysan maamulaha. Dugsigu waa inuu shaqada waxbarashada siiyaa ardayga la cayriyay inta lagu jiro mudada cayrinta. Waa masuuliyad saaran waalidka inuu la xariiro dugsiga si uu ugala hadlo helitaanka shaqadaas taasoo la siin doono waalidka 24 saac kadib marka uu codsiga soo diro. Isla marka uu dugsiga ku laabto ee cayrintu dhamaato, ardayga аяа masuul ka ах inuu

la xariiro macalin kasta si uu u xaqijiyo in dhammaan shaqada fasalka ee dhaافتay uu dhamaystiro. Maamulaha ayaa dalban kara shir lala qaato waalidka iyo ardayga iyo, haddii ay habboon tahay, macalinka kahor intaan ardaygu soo laaban. Yoolka shirkanka waa in la abuuro qorshaha guusha ee ardayga. Qorshaha ayaa la qori doonaa, la saxixi doonaa kadibna nuquollo looga bixin doonaa ardayga, waalidka iyo macalinka, iyo sidoo kale lagu dari doonaa diienda dugsiga.

Fasal Ka saarida Macalinku sameeyo

Ayadoo "Fasal Ka saaridu" ay qayb ka tahay Xeerka Isku dhafan ee Michigan, waxaan aaminsan nahay in ay tahay in la adeegsado marar dhif ah, ama aanba la adeegsanba. Macalinka ayaa arday ka saari kara fasalka macalinka muddo hal maalin ah haddii habdhaqanka ardaygu dhaafu xadka lagu qeexay xeerka maxaliga ah. Xeerka waa in loo dhaqan gashaa inuu qayb ka noqdo Xeerka Degmada ee Anshaxa Ardayda waana inuu sheegaa noocyada habdhaqanka ee ardayga looga saari karo fasalka. Haddii ardayga lagu hayo dugsiga, waa qasab inuu ku jiraa kormeer sax ah. Sharciga ayaa ka doonaaya macalinka talaabadaan qaadaaya inuu degdeg ugu sheego "fasal ka saarida" xafiiska, kadibna, sida ugu dhakhsaha badan, u balamiyaa kulan lala qaato waalidka ardayga la cayrshay ama masuulka lana iskudaya in laga qaybgeliyo la taliyaha dugsiga, shaqaalah Bulshada, ama dhakhtarka dhimirka. Haddii macalinka ama waalidku codsado in maamulaha dugsigu ka qaybgalo, macaliminku waa inuu sidoo kale ka qaybgashaa maamulaha kulanka. Arday ayaa ku laaban kara isla maalintaas dugsiga, maadada, ama shaqada laga saaray, ama marka uu amro macalinka iyo maamulaha dugsiga [MCL 380.1309]. Isha xogta: Xeerka Anshaxa Nooca MDE.

Tilmaamaha Fasal Ka saarida

Dadka u qalma inay adegsadaan fasal ka saarida waxaa ku jira macalimiinta Dugsiga Degmada Lansing ee masuulka ka ah fasalka, maadada ama shaqada.

Heerka dugsiga hoose, fasalka, maadada ama shaqada waxaa laga wadaa waqtiga xiisada ee macalinku sida tooska ah masuulka uga yahay bixinta casharka ama kormeerka. Heerka dugsiga sare, fasalka, maadada, ama shaqada waxaa laga wadaa waqtiga xiisada halka mar ee jadwalka ardayga kaasoo macalinku toos masuul uga yahay inuu casharka ama kormeer bixiyo.

Haddii macalinku cayrsho ardayga, macalinku waa inuu cayrinta iyo sababta cayrinta u sheegaa maamulaha si qoraal ah sida ugu dhakhsaha badan ee shaqada macalinku saamaxayso, laakiin ugu danbayn dhammaadka maalinta shaqada ee macalinka, asagoo adeegsanaaya foomka fasal ka cayrinta ardayga. Macalinku waa inuu dukumiintiyada u diraa maamulaha si uu u qaado talaabada ku habboon. Haddii ardaygu sii joogo dugsiga, maamulaha ayaa xaqijin doona in ardayga la gasho kormeerka ku haboon. Ardayga lagumasoo celin doono maalintaas dugsiga fasalkiisa, maadada ama shaqada macalinku ka cayrshay ayadoon heshiis wada ogol ah lala gelin macalinka cayrshay iyo maamulaha. Fasal ka cayrinta ayaa noqon kara keliya maalin oo dugsiga ah oo buuxda heerka dugsiga hoose ama hal xiisad oo buuxda heerka dugsiga sare.

Isla markaba marka fasalka laga cayrsho, ama ugu danbayn maalinta xigta ee dugsiga, macalinka ayaa ka codsan doona waalidka ardayga inuu kasoo qaybgalo shir looga hadlaayo cayrinta ardayga. Macalinku waa inuu natijada shirkha qoraal ahaan kula wadaago maamulaha ugu danbayn maalinta xigta ee dugsiga asagoo adeegsanaaya foomka warbixinta shirkada waalidka iyo macalinka. Markasta oo ay macquul tahay, la taliyaha dugsiga, dhakhtarka dhimirka ama shaqaalah bulshada waa in laga qaybgashaa shirkha. Maamulaha ayaa ka qaybgeli kara shirkha marka macalinka ama waalidku codsado.

U cayrinta ardayga dhanka Xafiiska Dhaqanka Dugsiga

Dhammaan ka joojinada dugsiga lagu talliyay oo 10 ama maalmo ka badan waxaa loo gudbinayaa Xafiiska Dhaqanka Dugsiga oo waxay u baahantahay in maamulaha ama wakiilka bixiyaan dokumentiyada taageerayo sharciga dajinta gobolka ee 7 da Qodob ee Qasabka ku ah Tixgelinta. Warbixinta Waaxda Badqabka Dadwaynaha ayaa looga baahan yahay cayrin kasta oo loo gudbiyo Xafiiska Dhaqanka Dugsiga.

Waa masuuliyad saaran maamulaha inuu qabto xiliga shirkha Xafiiska Dhaqanka Dugsiga dhammaanka maalinta xigta ee dugsiga. Maamuluhu waa inuu u sheegaa waalidka waqtiga, taariikhda iyo goobta kulanka. Maamulaha ayaa ka qaybgeli doona shirkha waalidka iyo ardayga, marka ay macquul tahay waana inuu dhaqan gashaa go'aanka uu gaaro Xafiiska Dhaqanka Dugsiga.

Dugsi Ka cayrinta

Ka saarida ardayga dugsiga sababo anshax awgood muddo **dhan 60 maalmood ama ka badan kuwa dugsiga la dhigto ah.**

Xadgudubyada daran ama waawayn ee Xeerka Ardayda (arag bogaga 28-32) ayaa keeni kara in dugsiga degmada lagaa cayriyo. Gudigga Waxbarashada ama wakiilkooda ayaa gaaraaya go'aanka ugu danbeeyaa ee dugsiga ka cayrinta. Dugsi ka cayrinta gobalku qasabka ka dhigay waxaa go'aaminaaya Gudigga Waxbarashada go'aanka ay gaaraana waa kama danbays. Dhammaan dugsi ka cayrinta waxaa go'aaminaaya Kooxda Talo Bixinta oo uu magacaabay Gudigga Waxbarashada.

Dugsi Ka cayrinta Gobalku Qasabka ka dhigaayo

(Buug yaraha Dugsiga oo La cusboonaysiyyay 380.1311)

Sharciga Gobalka ayaa soo jeedinaaya in Gudigga Waxbarashada ama wakiilkoodu tixgeliyo cayrin abadiyan ah, mawduuca dib usoo celinta macquulka ah ee Gudigga Waxbarashada sameeyaan, ee arday kasta oo:

1. Haysashada hubka khatarta ah (qoriga, mudaca, maxaaska, mindi af leh oo ka dheer sadex (3) inji dheerar ahaan, mindida jeebka ee qalabka ku dhex qarsoon, soofe, ama jijinta feerka) oo lagu haysto aaga dugsiga ee hubka ka caagan;
2. Ku isticmaala hub dab ah dhismaha dugsiga;
3. Fal danbiyeed galma ku galay dugsiga ama aagaga dugsiga;
4. Uu sameeyo (fasalka lixaad ama ka sareeya) weerar jireed oo ka dhan ah shaqaalaha dugsiga, mutadawaca, ama qandaraaslaha gudaha dhismaha dugsiga, ama gaariga la xariira dugsiga, ama munaasabada dugsiga, ayadoon laga eegayn goobta.

Sharciga gobalka ayaa soo jeedinaaya in ardayga laga saaro dugsiga muddada ugu yar ee ku qoran hoos kahor intaan dugsiga lagusoo celin:

1. Hub khatar ah (fasalada lixaad ama ka sareeya): cayrin abadiyan ah
2. Hub khatar ah (fasaxa shanaad ama ka hoos):
 - Sagaashan (90) maalmood oo kuwa dugsiga ah haddii qoriga ama hubka loo adeegsaday in qof loogu hanjabo
 - Toban (10) maalmood oo kuwa dugsiga ah haddii qoriga ama hubka aan loo adeegsan in qof loogu hanjabo
3. Weerarka jirka ee ka dhanka ah shaqaalaha ama mutadawaca:
 - Ardayda fasalka lixaad iyo ka sareeya: cayrin abadiyan ah
 - Ardayda fasallada shanaad iyo ka hoos: sida ay go'aanshaan gudigga Waxbarashada ama wakiilkooda
4. Fal Danbiyeedka Galmaada oo u qalma in qofka xabsi la dhigo sida ku cad Xeerka Ciqaabta ee Michigan: Boqol iyo sideetan (180) maalmood
5. Hubka suntu ah: Boqol iyo sideetan (180) maalmood
6. Soo jeedinta ah in si abadiyan ah ardayga looga saaro dugsiga waxaa gudigga Waxbarashada u gudbinaaya Kormeeraha guud ee Dugsiyada sodon (30) maalmood kadib marka ardayga la cayrsho ayadoo laga eebaayo natijada baaritaanka dhacdada ee ay sameeyeen sarkaalka badqabka dugsiga ee ay quasyo iyo/ama shaqaalaha xarunta dhexe ee Waaxda Badqabka Bulshada. Haddii xaalado kasii dara ay jiraan, Kormeeraha guud ayaa haysta toban (10) maalmood oo dheeraad ah kaasoo uu soojeedinta dugsi ka cayrinta ugu keenaayo Gudigga.

Sababaha Qasabka ah ee La tixgelinaayo

(Buug yaraha dugsiga ee Cusub 380.1310d [4])

Marka laga reebo adeegsiga/haysashada hubka, tixgelinta sababaha soo socda

ayaa qasab ah kahor intaan la hakin ama la cayrin arday 10 maalmood ama ka badan oo kuwa dugsiga ah:

1. Da'da Ardayga
2. Taariikhda Anshaxa
3. Xaalada Naafada
4. Darnaanta Habdhaqanka
5. Haddii habdhaqanku keenay khatar badqab
6. Haddii cadaalada Dhaqan celinta ay badali karto dabeeecada iyo in kale
7. Haddii faragelin yar ay xal u noqon karto dabeeecada ama inkale

Dugsigu waa inuu iskudayaa inuu adeegsado farsamooyinka Sixitaanka ah oo badal u ah cayrinta ama hakinta waxbarashada ardayga. Haddii dugsi uu hakiyo ama cayrsho arday, dugsiga ayaa tixgelin doona adeegsiga farsamooyinka Sixitaanka ah oo dheeraad ku ah hakinta ama cayrinta.

Fikirka Aan Lagu Qancin

Fikirka ah in hainta ardayga aysan ahayn wax waafaqsan ilaa sababaha 1310ad la tixgeliyo. Fikirka Aan Lagu Qancin waa midka soo baxa marka cadayn muujiso inaan fikirku sax ahayn.

Hakinta 9 maalmood ama ka yar, ma jirto fikir diidaaya qanaacada cayrinta, laakiin dugsigu waa inuu tixgeliyaa mid kasta oo kamid ah sababaha kore si uu go'an u gaaro.

Hal Shardi Dhaaf

Arday haysta hub (marka laga reebo qoryaha) ayaa keeni kara mid kamid ah waxyabaha soo socda sifo qeexan oo lagu qanci karo:

1. Hubka looguma talagelin in loo adeegsado hub ahaan, ama looma wadin cid kale oo u adeegsan doonta hub ahaan;
2. Hubka inuusan u haysan si ogaal ah;
3. Inaan ardaygu ogayn in aalada loo aqoonsan yahay hub ahaan;
4. In hubka lagu hayay soo jeedinta, codsiga ama oggolaanshaha shaqaalaha dugsiga, DPS, ama booliska

Fikirka Aan Lagu Qancin ee Hubka:

- Gudigga AMA wakiilka ayaa go'aaminaaya qoraal ahaan in ugu yaraan hal kamid ah shardi dhaafyada hubka lagu xaqiijiyay si qeexan oo lagu qanci karo IYO
- In ardayga aan horay looga saarin ama looga cayrin dugsiga

Dugsiga Degmada Lansing ayaa adeegsan karta masuuliyadeeda la xariirta cayrinta ardayga wax ka badan 10 maalmood ama hakin. Hase yeeshie, waxaa jiri kara sabab aan Lagu Qancin (fikir ah in cayrinta ay ahayd wax aan loo baahnayn marka lagu saleeyo caddaynta) ah inaan caymisku ahayn wax sax ah illaa (dugsigu) muujiyo maahee mid kasta oo kamid ah sababaha kor ku xusan.

Fasal Ka Cayrinta aan Qasabka ahayn

Sida uu qabo Sharciga Gobalku, Gudigga ama wakiilkooda ayaa cayrin kara ama eryi kara arday, taasoo waafaqsan suuragalnimada soo celinta ardayga, ku jira fasallada 6-12 oo:

1. Samaynta hanjabaada bamka ama hanjabaad lamid ah oo lagu sameeyo dhismaha dugsiga, hantida kale ee dugsiga, ama munaasabada la xariirta dugsiga.
2. Geysto weerarka jireed ee ku aadan arday kale oo dhismooyinka dugsiga, gaariga dugsiga la xiriiro ama howsha dugsiga ka faalo qaado iyadoon laga eegin gobtta.

Habdhaqan kasta, fasalada K-12, kaasoo khatar ku ah badqabka ardayda iyo/ama shaqaalaha Dugsiga Degmada Lansing ayaa keeni kara in dugsiga laga cayrsho ardayga.

Markay habboon tahay, ardayda dugsiga laga cayrsho ayaa loo gudbinayaa dacwad. Ardayga aaminsan in uu yahay dhibanaha fal danbiyeed galmo ayaa (1) dacwad cabasho rasmi ah ama dad ban u diri kara Saraakiisha U hogaansanaanta Degmada (arag bogga 6); (2) u gudbin kara cabasho danbiyeed wakaalada Sharci Fulinta ee ay qusayso; ama (3) gudbin kara labada nooc ee cabashada, si wadajir ah.

Habraacyada Racfaanka

Ka joojinta Ka joojinta Dugsiga

1. Waalidka ardayga kayar 18 sano jirka ama ardayga (haddii uu jiro 18) ayaa marka hore racfaan ka qaadan kara talaabada anshaxa una gudbinaaya maamulka soo rogay ganaaxa.
2. Heerka dugsiga sare, racfaanka dheeraadka ah ayaa loo gudbin karaa maamulaha.
3. Racfaannada ka sareeya heerka dugsiga ayaa loo diraya Kormeeraha Guud ee dugsiga ama wakiilkiisa.
4. Dhammaan racfaanada ka imaanayo meel ka baxsan Dugsiga Degmada Lansing ayaa u baahan in loo gudbiyo Kormeeraha guud.

Go'aamada Xafiiska Dhaqanka Dugsiga

1. Waalidka ardayga kayar 18 sano jirka ama ardayga (haddii uu jiro 18) ayaa ka codsanaaya foomka racfaanka Xafiiska Dhaqanka Dugsiga.
2. Foomka racfaanka waa in lagu ceshaa Xafiiska Dhaqanka Dugsiga shan (5) maalmood gudahood marka go'aanka qoran la helo.
3. Agaasimaha Fullinta ee Dhaqanka Dugsiga iyo Jawiga ayaa qaban doona kulan tobant (10) maalmood oo kuwa dugsiga ah ee gudaha kadib marka codsiga loosoo gudbiyo racfaanka.

Go'aamada Kooxda Wadatashiga

1. Waalidka ardayga kayar 18 sano jirka ama ardayga (haddii uu jiro 18) ayaa ka codsanaaya foomka racfaanka Xafiiska Dhaqanka Dugsiga.
2. Foomka racfaanka waa in lagu ceshaa Xafiiska Dhaqanka Dugsiga shan (5) maalmood gudahood marka go'aanka qoran la helo.
3. Kooxda Talo Bixinta ayaa qaban doona kulan dhagaysi ah tobant (10) maalmood gudahood kadib codsiga, haddii lasoo gudbiyay.
4. Waalidka ardayga kayar 18 sano jirka ama ardayga (haddii uu jiro 18) ayaa

ogaysiiska go'aanka oo qoraal ah ka helaaya Kooxda Talo Bixinta Cayrinta Ardayda.

Kooxda Talo Bixinta ayaa wakiil u ah Gudigga Waxbarashada; sidaas awgeed go'aanka ay ka gaaraan racfaanku waa kama danbays. Ma jiro hanaan dheeraad ah oo racfaan oo go'aankaan laga qaadan karo. Dhammaan cayrinnada qasabka ah ee ay sameeyaan Gudigga Waxbarashada ee Dugsiga Degmada Lansing waa kama danbays mana jiro racfaan laga qaadan karo.

Dib usoo celin

Arday abadiyan loo cayrshay ayaa codsiga ah in dugsiga lagu cesho u dirsan kara Gudigga Waxbarashada sida sharcigu u fasaxaayo. Arday kasta oo la cayrshay waa in lagusoo ceshaa dugsiga sida ku cad shuruudaha dib usoo celinta ardayda. Shuruudahaan waa sida soo socota:

1. Bayaanka, waxaa bixiyay waalidka, oo ka timid la taliyaha shatiyeysan, oo sheegayo in ardayga uu si qanacsan uga qeybqaatay ugu yaraan lix (6) kulamo la tashi oo waxaa lagu taliyay in isaga/iyada ku soo laabtaan barnaamijka joogtada ah dugsiga.
2. Bayaanka qoraalka ah, ee uu keeno ardayga, kaasoo sheegaaya inuu diyaar uyahay inuu ku dhaqmo dhammaan xeerarka iyo sharciyada ku qoran Buug yarah Ardayga.
3. Bayaan kasoo baxay maamullada sharci Fulinta maaliga ah, oo ay soo qaadeen Adeegyada Ardayda, kaasoo sheegaaya in aysan jirin dhibaato kale oo sharciga ka dhan ah oo ardaygu galay.
4. Xaqijinta, ay soo qaadeen Adeegyada Ardayga, oo sheegaaya in ardayga aan lagu helin asagoo si khaldan kusoo galaaya Dugsiga Degmada Lansing intii lagu jiray muddada dugsiga laga cayrshay.
5. Xaqijinta, ay soo qaadeen Xafiiska Dhaqanka ee Dugsiga, oo sheegaaya ka qaybgalka Isbahaysiga Qalin jabinta ee ardayda da'doodu u dhexayso 14-19 sano.

In si lagu qanco loo dhamaystiro shuruudaha kore kama dhigna inay keenayso in ardayga dib loo aqbalo, laakiin waxay noqon doonaan heerka ugu hooseeya ee dadaalka iyo habdhaqanka ay qasab tahay inuu ardaygu muujiyo markuu codsiga dib u diiwaan gelinta soo diraayo. Shuruudo dheeraad ah ayaa lasoo rogi karaa, markay muhiim u noqdaan xaaladaha gaarka ah.

* Xaalada anshaxa ardayga ayaa la doonaya inay ahaato mid joogto ah ilaa inta uu ku jiro hanaanka racfaanka.

Tilmaamaha Edbinta

Nooca Anshaxa

Nooca Anshaxa ayaa qusaysa aqbaladaa xaquuqaha iyo waajibaadka qofkasta oo kujira hanaanka; ardayga, waalidka, macalinka, maamulaha iyo dhammaan shaqaalaha kale ee dugsiga. Inkastoo Maamulaha Dugsigu qaadaayo masuuliyada koobaad ee ilaalinta xakameynta iyo anshaxa gudaha dugsiga iyo garoonnada dugsiga, macalin kasta waxaa saaran masuuliyad wayn oo uu ku ilaalinaya daganaanshaha iyo anshaxa fasalkiisa. Macalimiinta ayaa sidoo kale qayb ku leh masuuliyada ilaalinta amaanka iyo anshaxa goobaha kale ee dhismaha dugsiga iyo garoonnada. Tallaabooyinka edbinta iyo qaababka waa inay noqdaan kuwo macquul ah, cadaalad ah, dhakhso ah oo waafaqsan xeerarka iyo habraacyada Buug Gacmeedka Ardayda ee Degmo Dugsiyeedka Lansing.

Dugsiga Degmada Lansing ayaa aqoonsan in waalidiintu ay qayb aasaasi ah u yihiin waxbarashada cunugooda, taasoo ay ku jirto habdhaqankiisa markuu dugsiga joogo. Sidaas awgeed, si loo joogteeyo xog siinta waalidka, macalimiinta iyo shaqaalaha kale ayaa la xariiri doona waalidka si loo hubiyo in waalidku ogyahay arimaha la xariira habdhaqanka ilmaha. Natijjooyinka hormarka ah ee wanaagsan waa in sidoo kale lagu taageero caawimaad wanaagsan oo hormarin leh.

Heerka 1 aad: Caawimaada Macalinka/shaqaaluhu Sameeyaan

Macalimiinta/kooxaha/shaqaalaha ayaa samayn kara mid kamid ah talaabooyinka soo socda:

1. Samee sharchiyada/filashoooyinka fasalka qeexan oo kooban iyo cawaaqibyada ku saleysan filashoooyinka dugsigoo dhan oo loo hirgeliyo si daacad ah
2. Iisticmaal xoojin wanaagsan oo dabeeecada la filanayo
3. Inay aqoonsadaan ayna abaal mariyaan dabeeecada wanaagsan ee dhammaan ardayda
4. Inay u gudbiyaan maareeyaha kiiska, kooxda caawimaada gacan siinta
5. Inay taleefanka ka wacaan waalidka (la wadaagaan meelaha hormarka laga gaaray)
6. Waraaq u diraan waalidka (la wadaagaan waxyaabaha wanaagsan iyo meelaha hormarka laga sameeyay)
7. Waqtiga Fasaxa/Qolka Saaxiibka: Ka saarida ardayga hal maalin barkeed ama ka yar
8. Xabsi: Xirida ardayga sababo anshax xumo awgood, inta lagu jiro ama kadib saacadaha dugsiga

9. Shaqo xadidan: U diidista ka qaybgalka shaqooyinka dugsiga iyo/ama munaasabadaha manhajka ka baxsan (ayna ku jiraan nasiinada)
10. Adeegga dugsiga/bulshada: In ardayga loo dhiibo shaqada adeegga dugsiga/bulshada
11. Fasalka ka joojinta
12. U gudbinta la taliyaha dugsiga, maareeyaha kiiska, kooxda caawimaada gacan siinta (Taqasuslaha Iskuxirka Bulshada, Shaqaalaha Bulshada, Taqasuslayaasha Taageerada Ardayga, U doodayaasha Ardayga, Taqasuslayaasha Dabeeecada), Shaqaalaha Xaadirinta, dhakhtarada Soo celinta Cadaalada ama qofka (dadka) kale ee shaqaalaha ah.
13. Heshiiska Dabeeecada ama Guusha/Qorshaha Dabeeecada ee ardayga/waalidka lala dajiyo: Bayaanka qoran oo ay ku cad yihiin talaabooyinka iyo cawaqqibyada la qaadaayo si kor loogu qaado dabeeecada ama xaadirista
14. Ayadoo la kaashanaayo maamulaha dugsiga, ka eeg Kooxda Cilad bixinta/ Caawimaada Dabeeecada: Kulanka shaqaalaha dugsiga, waalidiinta, iyo shaqsiyaadka kale si looga baarana dego hormarka dabeeecada iyo/ama hormarka ardayga loona sameeyo talooyin
15. Dookhyada kale ayaa laga hadlayaa waalidiinta, macalimiinta iyo maamulayaasha
16. Tilmaamaha aan afka aheyn ee dib u jaheynta
17. Digniinta hadalka
18. Sii ardayga nasiinyo
19. Dib u eeg, cadee, oo xooji filashoooyinka/heshiyyada
20. Bixi tilmaamo cad
21. Badel filashada haddii hoyga loo baahanyayah
22. Dhedhaxaadinta iyo muujinta joornaalka (qoran ama la duubay)

Heerka 2 aad: Caawimaadaha Maamuluhu Hagaayo

Shirkada maamulaha/waalidka/ardayga waa in la qabtaa waana inuu ku dhacaa isku darka mid ama ka badan kamid ah waxyaabaha soo socda:

1. Ogaysiiska rasmiga ah ee maqnaanshaha oo loo diro waalidiinta
2. U gudbinta Dhakhtarka Cadaalada Dhaqan celinta
3. Dugsiga sabtida/fiidkii: Barnaamijyada haynta ee Sabtida ama saacadaha kale ee ka baxsan dugsiga

4. U gudbinta xafiiska DPS oo ka baaran daga wax ka qabashada
5. Dooqyada sida loogala hadlay waaladiinta, macalimiinta, iyo maamulayaasha tusaale ahaan adeega bulshada, soo celinta, iwm.
6. Maamulaha ama wakiilka ayaa keeni doona dukumiintyo taageeraaya tixgelinta 7 sabab ee sharciga gobalka, kaasoo qasab ah
7. U gudbinta Community Mental Health-ACCESS oo qiimaynta isticmaalka maandooriyaha iyo caafimaadka dhimirka.
8. Luuqada wax ku oolka ah
9. Dib u firi filashooyinka
10. Kala wareeg sheyga carqaladeynta cadadka go'an ee waqtiga oo u ogolow ardayga muujinta joornalka ee filashooyinka iyo sababta sheyga loola wareegay iyadoo la isticmaalayo luuqad wax ku ool ah
11. U qor ama u duub raali gelin qof walba ee ay saameysay falalka
12. Milicsiga qoran
13. Ka saarida ku meelgaarka ah ee fasalka iyo wada sheekeysiga soo celinta aan qorsheysneyn
14. Jaheeyaha qofka weyn (10-30 maalmood imaanshaa iyo taageerida)
15. Xadeynta qofka weyn ee imaanshaha/bixitaanka (10 maalmood)
16. Milicsiga "Think Sheet" oo leh su'aalaha soo celinta
17. Soo celinta xalinta dhibaatada
18. Aamusnaanta xiliga qadada

Heerka 3 aad: Dookhyada Kale ee Gudaha Dugsiga

1. Ku meeleynta ardayga ee barnaamijka kale ee dugsiga dhexdiisa
2. Meeleynta (xabada 1) oo lagu daray Heerarka 1 iyo 2 cawaaqiibaha
3. Badelka shaqada fasalka
4. Qorshaha hab dhaqanka ee adeega bulshada ee dugsiga la xiriiro
5. Qorshaha dabeeecada ee loo dajiyoo ardayga/waalidka: Bayanka qoran oo ay ku cad yihiin talaabooyinka iyo cawaaqibyada la qaadaayo. Bayanka ayaa sidoo kale qeexo taageerada ay bixinayaan shaqaalaha dugsiga iyo/ama waalidka sidoo kale sida taariiqda markii qorshaha dib loo eegayo
6. Gudbinta nidaamyada soo celinta cadaalada oo leh xiriir dhameystiran oo dhinacyada ku lugleh
7. U gudbinta shaqaalaha waxqabadka dabeeecada
8. U gudbinta Kooxda Adegyada Ardayda/Kooxda Waxqabadka Dabeeecada

Heerka 4 aad: Cayrinta Ka baxsan Dugsiga (Ilaa iyo ayna ku jirto 9 maalmood)*

Caymiska shirkha waalidka iyo qorshaha dib usoo celinta, taasoo ay qasab tahay in lagu daro caawimaada Heerarka 1-3 sida haboon.

Heerka 5 aad: Cawaaqibyada Kale/Barnaamijyada

1. Qorshaha dabeeecada oo leh jadwal la badelay oo wato Maamulka Dhexe ee la ansixiyay.
2. Qorshaha dabeeecada ayaa waxaa ku jiri karo Heerarka 2,3, 4 cawaaqiibaha
3. Wadatashiga/waxqabadka Xafiiska Dhaqanka Dugsiga
4. Wareejinta Maamulka
5. Gudbinta barnaamijyada kale
6. Wixii shakiyada 10 maalmood ama ka badan, dokumentiyada taageerayo sharci dajinta gobolka 7 xaqiiq tixgelinta waa **qasab**

Heerka 6 aad: Kulanka Eryida/Cayrinta

Cayrintu waa in ardayga loo diido xquuqda dhigashada dugsi ama shaqooyinka dugsigu baxsho.

- Soo jeedinnada u cayrinta ardayga dhanka Xafiiska Dhaqanka Dugsiga si looga baarana degoo cayrintiisa, ayadoo la tixgelinaayo sababaha 7 ah.

*Maamuluuhu waa inuu la xariiraa waalidka/masuulka uuna sameeyaa qorshe ardayga lagu siinaayo layliyada maalin kasta ama asbuuc kasta iyo/ama imtaxaanadkiisa.

Saraakiisha U hogaansanaata Degmada

Darin Walter

Title IX Xiriiriyyaha
darin.walter@lansingschools.net
517-755-2037

Erin Miracle

Title IX Sarkaalka U hogaansanaanta
erin.miracle@lansingschools.net
517-755-2010

K-8 Wuxqabodka Elmiinta

*Wuxuu u baahan
yahay In loo
cayrsho Xafiiska
Dhaqanka Dugsiga.

DABEECADHA KEENAAYA KU WAXQAABDKA 9WAXQAABDYADA)	WARBIXINTA DPS EE QASABKA AH	KHALADKA CARRURTA CAAWIMAADAHAA QAYBAYSAN	KHALAD DHEXEDHEXAAD AH OO SOO NOQNOODAY CAAWIMAADAHAA QAYBAYSAN	QAYB WAYN WAXQABADKA/ WAXQABADYADA*
Luuqad Xad gudub ah	Maya	1-2	1-4	-
Khamriga	Haa	-	2-4	5-6
*Hub sun ah	Haa - La xariir Dab damiska	-	-	5-6
Weerarka Shaqaalaha (jirka)	Haa - haddii loo gudbiyay Xafiiska Dhaqanka Dugsiga ama dhaawac jiro	1-2	2-4	5-6
Weerarka Ardayga (jirka)	Haa - haddii loo gudbiyay Xafiiska Dhaqanka Dugsiga ama dhaawac jiro Caawimaada waa in lagu qoraa Synergy.	1-2	2-4	5-6
Hanjabaada Bamka - Hanjabaadka Ka dhanka ah Dugsiga	Haa	2-3	2-3	4-5
U xoog sheegasho	Haa - Marka habdhaqanku noqdo mid soo noqnoqda ama ardayga loo cayrsho Xafiiska Dhaqanka Dugsiga	1-2	2-4	5-6
Qiyaameyntha/Qashka	Maya	1-3	2-4	-
Habdhagan Fawdo ah	Maya	1-2	2-4	5
Aaladaha Isgaarsiinta Elektarooniga ah (ECDs)	Maya - ilaa in ardayga loo cayrshay maahee Xafiiska Dhaqanka Dugsiga	1-2	2-4	5
Aaladaha Qaraxyada/Shilka libinta, Haysashada ama Adeegsiga	Haa	1-2	2-4	5-6
Handadaada/Dhaca	Haa	-	2-4	5-6
Wacitaanada Alaarmiyada/911 Beenta ah	Haa	-	2-4	5
Dagaalka	Dagaalka 1aad iyo 2aad: Maya Dagaalada joogtada ah: Haa	2-3	2-4	5-6
Been aburka Saxiixa	Maya	1-2	1-4	-
Khamaarka	Maya	1-3	1-4	-
Falka Burcadda	Haa	1-3	1-4	5
Khatar gelinta	Maya	1-3	1-4	-
Amar diido	Maya	1-2	1-4	-
Caga juglayinka/Dabagalka/Hanjabaadaha ku aadan Ardayda	Haa	1-3	2-4	5-6
Burburinta Kaska ah	Maya - ilaa in xaaladu la xariito maahee hanti qiimaheedu gaaraayo \$200+	1-2	2-4	5
Marijuana iyo Maandooriyaasha Kale	Haa	-	2-4	5
Ciyaal suuqnimo ama Hbdhaqan Anshax xumo ah	Maya - ilaa in ardayga loo cayrshay maahee Xafiiska Dhaqanka Dugsiga	1-3	2-4	5
Haysashada/Adeegsiga agabka U eg Hubka/Boonbalada ama Hub lamood	Haa	-	2-4	5-6
Haysashada/Adeegsiga Qoriga Dheemiska (Airsoft)	Haa	-	2-4	5-6
*libinta/Qaybinta Daroogooyinka ama Khamriga	Haa	-	-	5-6
*Weerar Galmo	Haa	-	-	5-6
Qoraalka galmeda/Qaawinta Ilmaha	Haa	1-3	2-4	5-6
Dhibaatayntha Galmeda	Haa	1-3	2-4	5
Xatooyada	Maya - ilaa in xaaladu la xariito maahee hanti qiimaheedu gaaraayo \$200+	1-3	2-4	2-5
Agabka Tubaakada iyo Shiishada	Maya - ilaa inuu yahay danbi soo noqnoqda maahee	-	2-4	-
Joogitaanka/Xad ku socodka/Dabagalka	Haa - adeegso digniinta ama waraaqda gelitaanka, xeerarka danbiga oo la arkay (warbixin buuxda aayaas qasab ah)	1-3	2-4	-
Jabinta Xeerarka Magaalada, Sharciga Gobalka, ama Federaalka ama Sharciyada Danbiga	Haa	2-3	2-4	5-6
*Hubka - Haysashada ama Adeegsiga	Haa	2-4	4	5-6

9-12 Wuxqabackan Edbixinta

DABEECADHA KEENAAYA KU WAXQAABDKA 9WAXQAABDYADA)	WARBIXINTA DPS EE QASABKA AH	KHALADKA CARRURUTA CAAWIMAADHA QAYBAYSAN	KHALAD DHEXEDHEXAAD AH OO SOO NOQNOQDAY CAAWIMAADHA QAYBAYSAN	QAYB WAYN WAXQABADKA/ WAXQABADYADA*
Luuqad Xad gudub ah	Maya	1-2	1-4	-
Khamriga	Haa	-	2-4	5-6
*Hub sun ah	Haa - La xariir Dab damiska	-	-	5-6
Weerarka Shaqaalaha (jirka)	Haa	-	-	5-6
Weerarka Ardayga (jirka)	Haa. Caawimaada waa in lagu qoraa Synergy.	-	2-4	4-6
Hanjabaada Bamka - Hanjabaadka Ka dhanka ah Dugsiga	Haa	-	-	5-6
U xoog sheegasho	Haa - Keliya marka habdhaqanku noqdo mid soo noqnoqda ama ardayga loo cayrsho Xafiiska Dhaqanka Dugsiga	1-2	2-4	5-6
Qiyaameynta/Qashka	Maya	1-3	3-4	-
Maandooriyaasha ama Daroogooyinka Kale	Haa	-	2-4	5
Habdhaqan Fawdo ah	Maya	1	1-4	5
Aaladaha Isgaarsiinta Elektarooniga ah (ECDs)	Maya	1-3	2-4	5
Aaladaha Qaraxyada/Shilka libinta, Haysashada ama Adeegsiga	Haa	1-2	2-4	5-6
Handadaada/Dhaca	Haa	-	4	5-6
Wacitaanada Alaarmiyada/911 Beenta ah	Haa - La xariir Dab damiska	-	4	5-6
Dagaalka	Haa	-	Dagaalka 1aad iyo 2aad 3-9 maalin ka joojin ah	5-6 Dagaalada Joogtada ah*
Been abuurka Saxiixa	Maya	1-3	1-4	-
Khamaarka	Maya	1-3	1-4	5
Falka Burcadda	Haa	1-3	1-4	5-6
Khatar gelinta	Maya - ilaa in ardayga loo cayrsho maahee Adeegyada Ardayda	1-3	4	5-6
Amar diido	Maya	1-3	1-4	-
Caga juglayinka/Dabagalka/Hanjabaadaha ku aadan Ardayda	Haa	-	1-4	5-6
Burburinta Kaska ah	Maya - ilaa in xaaladu la xariiro maahee hanti qiimaheedu gaaraayo \$200+	1-3	2-4	5
Marijuana iyo Maandooriyaasha Daroogada	Haa	-	2-4	5-6
Ciyaal suuqnimo ama Hbdhaqan Anshax xumo ah	Haa	1-3	2-4	5
Haysashada/Adeegsiga agabka U eg Hubka/Boonbalada ama Hub lamood	Haa	-	2-4	5-6
Haysashada/Adeegsiga Qoriga Dheemiska (Airsoft)	Haa	-	2-4	5-6
*libinta/Qaybinta Daroogooyinka ama Khamriga	Haa	-	-	5-6
*Weerar Galmo	Haa	-	-	5-6
Qoraalka galimada/Qaawinta Ilmaha	Haa	-	2-4	5-6
Dhibaatyntha Galimada	Haa	1-3	2-4	5
Xatooyada	Maya - ilaa in xaaladu la xariiro maahee hanti qiimaheedu gaaraayo \$200+	1-2	2-4	-
Agabka Tubaakada iyo Shiishada	Maya - ilaa inuu yahay danbi soo noqnoqda maahee	-	2-4	-
Joogitaanka/Xad ku socodka/Dabagalka	Haa - Haddii eedeyamaha dambiga la raadiyo ama haddii warqaaha digniinta xad ku socodka loo diray deegaanka.	1-2	2-4	-
Jabinta Xeerarka Magaalada, Sharciiga Gobalka, ama Federaalka ama Sharciyada Danbiga	Haa	2-3	2-4	5-6
*Hubka - Haysashada ama Adeegsiga	Haa	-	-	5-6

*Wuxuu u baahan
yahay In loo
cayrsho Xafiiska
Dhaqanka Dugsiga.

Anshaxaa ardayda leh Qorshayaasha


IEP da iyo 504

Ardayga qaba naafada ee leh Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ayaa leh xaqquqaha damaanada hanaanka oo la xariira anshaxaa. Qodobada hoose laguma bedelin ogeysiinta illaalada habraacyada buuxo oo laga yaabo in laga helo halkaan: https://www.lansingschools.net/downloads/special_education/procedural_safeguards_notice_550307_7.pdf

1. Ardayda leh IEPs waxaa laga yaabaa in la edbiyo illaa 10 maalmood dugsi. Adeegyada waxbarashada ayaa la siin karaa ardayga, haddii degmadu ay adeegyada siiso dhammaan ardayda sidaas oo kale dugsiga looga saaray.
2. Kahor cayrinta ardayga, cidda cayrinaysa waa inay tixgeliyaan sababaha ku qoran Xeerka Cusub ee Dugsiga oo ku qoran 380.1310(d).
3. Markii ardayda leh IEP laga joojiyo wax ka badan 10 maalmood, taariiqda dugsiga gaaro go'aanka lagu sameynayo ka saarida taasoo lagu badelo meeleynta ardayga sababtoo ah ku xadgudubka xeerka anshaxaa ardayga, dugsiga degmada waa inay ogeysiisaa waalidka go'aankaas oo ay siisaa waaladiinta ogeysiinta illaalada habraaca. Kadibna ardayga ayaa xaq u leh Dib u eegista Dhaqan Gelinta Go'aanka (MDR). Cayrin kasta oo kaas ka danbeeyaa ayaa u baahan kara MDR.
4. MDR yada waa inuu buuxiyaa waalidka/masuulka, shaqaalaha dugsiga, iyo xubnaha ay qusayso ee kooxda IEP da ardayga 10 maalmood gudahood kadib marka go'aanka badalka meelaynta la gaaro.
5. Ka joojinta gudaha dugsiga looma tixgelinayo qeyb ka mid ah maalmaha ka joojinta haddiiba ardayga la siiyo fursada ay ku sii wadaan inay si ku haboon ugu hormaro manhajka guud, sii wadaan inay helaan adeegyada gaar u ah IEP ardayga, oo sii wad ka qeybqaadashada ardayda aan naafada-aheyn illaa iyo xad ay ku yeelan lahaayeen meeleynta hadda.
6. Xaaladaha ardayga la cayrin karo wax ka badan 10 maalmood, la tashiga Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ayaa fiican.

Fadlan arag nidaamka edbinta oo ardayda leh qorshooyinka IEPs ama 504 ee lagu soo gudbiyay shaxda Xafiiska Dhaqanka Dugsiga ee bogga xiggo wixii warbixin dheeraad ah.





Lifaaqaa

Xeerka Anshaxaa Waxbarashada Oonleenka ah

Ardayda fasalada K-12 ee Aaga Bartamaha ee helaaya casharada oonleenka waxay quseeyaan xeerarka degmada ee Xeerka Anshaxaa Ardada sidoo kale sida Xeerka Anshaxaa Waxbarashada Oonleenka ah. Waxaa jira xeerar dheeraad ah iyo higsiyada ardayda inta lagu jiro waxbarashada oonleenka ah si loo hubiyo badqabka shaqaalaha, waalidiinta iyo ardayda. Dhamaan ardayda waxaa laga filayaa inay u adeegsadaan waxbarashada Oonleenka ah qaab leh qadarin, sharci ah, oo xasaasi ah oo ku aadan dareennada dadka kale.

Isticmaalka Saxda ah ee Tignooloojiyada

Waxaa jiro tiro webseedyo ah oo ay ku jiraan waxyaboo aflagaado ah, sharci daro ah, aqlaaq xun oo aan habboonayn kuwaasoo aan loo ogolayn ardayda. Dugsiga Degmada Lansing ayaa samayn doonta dadaal kasta oo suurtagal ah si loo xanibo webseedyadaas hase yeeshi waxaa la filayaa in ardaydu ay wax baaraan ayagoo adeegsanaaya webseedyada quseeya mawduucyada koorsada. Wuxaan iskaashi la samayn doonaa waalidiinta sannadka oo dhan, waxaana bandhig gaar ah ka samayn doonaa Amaanka oonleenka ee ay bixinayo deeqdeena STAR oo la siinaayo dhammaan shaqalaaha iyo waalidiinta maadaama ay qusayso badqabka interneedka.

Himilooyinka iyo Eedaabta Ardayda

Himilooyinka Maalin Kasta ee Ardayda Waxbarashada Oonleenka ah

- Ardaydu waa inay soo galaan fasaladooda oonleenka ah maalin kasta si loo siiyo layliyada.
- Waa inay u soo sheegaan arimaha khadka, helitaanka oonleenka, ama hardware ka si degdeg ah macalimiintooda.
- Waa inay buuxiyaan dhammaan layliyada/mashruucyada waqtiga loo asteyay.

- Ugu soo biir kulamada sida jadwaleysan, oo si firfircoon uga qeybqaado casharada fasalka.
- Waa inay raacaan isla tilmaamaha habdhaqanka ee ku cad xeerka buuga ardayda inta lagu jiro waxbarashada Oonleenka ah (tusaale, ma adeegsan karaan luuqad cay ah, hanjabaado, cagajuglayn, xoog u sheegasho, isdaba taag, iwm.).
- Waa inaad la hadashaa macalinkaaga dhammaan inta lagu jito HMH ka (K-8), Michigan Virtual (9-12), ama iimeel dirtaa haddii aad dhibaato ku qabto samaynta layliyada.
- Dhammaan ardayda waxaa laga filayaa inay keenaan shaqo ku salaysan dadaalkooda shaqsiga ah ayna sheegaan meelaha ay kasoo xigteen tusaalayasha marka loo baahdo. Ardayda sida kaska ah u koobiyeeyaa shaqooyinka dadka kale ama u ogolaada dadka kale inay adeegsadaan shaqadooda ayaa waajiji doona hanaannada anshaxaa si waafaqsan xeerka anshaxaa ardayda.
- Ardayda iyo waaladiinta ayaa lagu dhiirogelinayaa inay soo ogeysiyyaan macalinka/maamulaha canugaaga haddii ay dhacdo in arimo walboo badqabka ah inta lagu jiro waxbarashada.
- Ardayda ayaa masuul ka ah hubinta in magacyada isticmaalahaa ama baaswuudhyo aan lala wadaagin dadka kale inta lagu jiro waxbarashada onleenka.

Anshaxaa Ardayga inta lagu jiro Waxbarashada Oonleenka ah

- Ku biir casharada waqtiga saxda ah oo ku sugnoow adoo codka iska xiraaya ilaa casharada uu baxsho macalinku.
- Qaybta wada sheekaysigu waa mid guud, qof kastana waa arki karaa waxa aad qorto!
- Duubista shaahada iyo gelinta baraha bulshada ayaa gabii ahaanba mamnuuc ah.
- Iska ilaali wada sheekaysiga gaarka ah.

- Ardaydu waa inay kasoo galaan cashar kasta meel bilaa buuq ah, oon lahayn mashquul taasoo aag aysan dhib u arkayn in dadka kale arkaan.
- Ardaydu waa inay xidhaan dhar wanaagsan si waafaqsan xeerka anshaxa dugsiga inta lagu jiro casharka muuqaalka ah.
- Ardaydu waa inay furtaan muuqaalka si macalinku u arko asaga iyo ardayda kaleba.
- Iskuday inaad ka qabto casharada muuqaalka ah.
- Ardaydu waa inaysan gelin casharada muuqaalka ah ee aan lagu casuumin.
- Waa inay iska ilaaliyaan adeegsiga boonbalayaasha, ciyarta muuqaalka ah, iyo taleefannada gacanta inta lagu jiro waxbarashada shaashada.

Talaabada Edbinta

Talaabada Anshaxa ee Dabeecada aan La aqbali karin Inta lagu jiro Waxbarashada Oonleenka ah

- Carqaladaha ku dhaca kulanka oonleenka ah ayaa keeni kara in ardayga laga saaro qayb ama dhammaan casharka.
- Ardayda laga saaray casharada oonleenka ah ee dabeecada fawdada ah ayaa laga yaabaa inaysan helin wax buundo ah oo la xariirta nashaadada, shaqda fasalka, qiiimaynta, ama ka qaybgalka la sameeyay asagoo maqan.
- Fawdada lasoo sheegay ayaa loo sheegi doonaa maamulaha waxayna keenaysaa in ardayga laga cayrsho casharada oonleenka ah.

Habdhaqannada Keeni kara Talaabo Anshixin ah

- Inaad markasta codka furato kadib marka macalinku codka kaa xiray.
- Ka qaybgalka dhibaataynta iyo u xoog sheegashada oonleenka.
- Diidista raacida xeerarka casharka oonleenka ah ee macalinku dajiyay.
- Labiska xun ee casharka (dhar qaawanaan ah, fariimo anshax xun oo dharka ku qoran).
- Xayeysiinta ujeedo siyaasadeed oo xisbi gaar ah ilaa inay waafaqsan tahay maahee manhajka.
- Khiyaannada ama Tuugnimada.

Waajibaadka Waalidka/Masuulka

Markaad tahay waalidka/Masuulka arday oonleen barta waa muhiim inaad aqoonsato doorka muhiimka ah ee aad ku leedahay guusha hananaka waxbarashada Oonleenka ah. Wuxaan aqoonsan nahay in ay jiraan suuragalmiada carqalado dhawr ah iyo muhiimado kale oo ardaydu lahaan karaan marka laga hadlaayo shaqada oonleenka dhiiri gelintaada iyo taageeradaaduna ay muhiim u tahay ku boorinta ardayda inta lagu jiro waxbarashada oonleenka ah. Macalimiinta iyo shaqaalaha maamulka ayaa xariir joogto ah la lahaan doona waalidiinta iyo masuuliyiinta si looga waramo shaqada ardayga si lamid ah markii fasalka la imaan jiray. Fadlan sii wad inaad ka taageerto Dugsiga Degmada Lansing adoo uga soo qeybgelinayo ardaygaaga maalin walba waaya aragnimada waxbarashada onleenka ah

